Caddadkii 27ka | Maajo, 2020



# MAQAALLADA ARRIMAHA AQOONTA

## ARRINTA GAAR AH:

## Xalalka Waara ee Soomaaliya

Enhancing Intergration of Displacement Affected Communities in Somalia

EIDACS

CONCERN worldwide

ENDING EXTREME POVERTY WHATEVER IT TAKES

# Tusmo:


3 **Hordhac: Isbedelka Xalalka Waara ee ka jira Soomaaliya waxaa qoray** Peter de Clercq iyo Beatriz Valbuena

6 **Dadaalka Xalalka Waara ee ka jira Soomaaliya waxa qortay** Teresa del Ministro

10 **Casharradii laga bartay Iskaashiga Qaabilsan Xalalka Waara ee Barnaamijka EU RE-INTEG waxa qoray** Rufus Karanja iyo Beatriz Valbuena

15 **Cabbiridda Horumarka Laga Sameeyey Xalalka Waara waxa qortay** Lena Von Naso

18 **Dhexda Maqaalladda: Garaaf-xogeedka EIDACS oo ay diyaarisay** Beatriz Valbuena

20 **Ka-qaybgalka Bulshada ee loo marayo DAC Fora ee Iskaashiga EIDACS waxa qortay** Stefanie Barratt

23 **Awood-siinta dhaqaale ee haweenka iyada oo loo marayo Kooxo Is-caawiya** Courtenay Cabot Venton

29 **Hoy ka-saarid: Waa kan ugu muhiimsan Iskaashiga  Xalalka Waara ee ka socda Soomaaliya waxa qoray** Joseph Jackson

31 **Xiritaanka EIDACS iyo waaridda waxa qortay** Beatriz Valbuena

34 **Qorayaasha Ka-qaybqaatay (dhammaadka)**


## Ereyga Tifaftiraha Caddadkan:

Ku soo dhawow soo-saaridda gaarka ah ee Maqaallada  Arrimaha Aqoonta  oo ku saabsan Xalalka Waara. Caddadkan ayaa waxa diiradda lagu saaray sahaminta horumarka laga sameeyay, caqabadaha hortaagan iyo casharrada laga bartay barnaamijyada iyo Iskaashiga Xalalka Waara ee 3dii sano ee la soo dhaafey ay Soomaaliya ka hirgaliyeen Concern iyo la-hawlgalayaasha kale ee hirgelinayey.

Maanta tirada dadka ku barakacay gudaha dalalkooda ee caalamka oo dhan ayaa ah tii abid ugu badnayd. Colaado, rabshado, masiibooyin dabiici ah iyo cudurro safmar ah ayaa keeni kara khatarro cusub oo sii kordhiya barakac daba-dheeraada oo halis geliya ka-miro-dhalinta xalal joogto ah, gaar ahaan degaannada magaalooyinka ah. 'Xal Waara' (dib-u-celin khiyaari ah, dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka iyo dib-u-dejin) ayaa la gaarey marka barakacayaashu aanay u sii baahnayn ilaalin iyo caawimo gaar ah oo ku xiran barakacooda, oo ay xuquuqahooda heli karaan iyada oo aan lagu takooreyn barakacooda. Xaaladda noocan ah, ayaa Xalka Waara uu noqonayaa wax dhaafsiisan qaybta bani'aadamnimada, waa hab qaybo badan taabanaya si loo gaaro dib-u-dhexgelinta bulshada iyo waaridda wuxuna diiradda saarayaa dadka barakacay iyo kuwa uu saameeyey barakacu, oo ay ka mid yihiin qaxootiga, kuwa soo guryo-noqday iyo bulshooyinka martigelinaya.

Marka deeq-bixiyeyaasha iyo hay'adaha ay naqshashadaynayaan ajandaha bani'aadamnimada ee sannadaha soo socda, dadka gudaha ku barakacay (IDPs), gaar ahaan haweenka oo ay badanaa si ba'an u saamayso, waa in ay xuddun u noqdaan doodaha. Maamulada degaanka waa in ay safka hore kaga jiraan dedaalka naqshadaynta, maadaama ay wax ka qaban doonaan barakaca mustaqbalka. Marka la raadinayo xalal joogto ah mas'uuliyad qaran, hoggaamin iyo isla-xisaabtan caalami ah ayaa noqonaya kuwo intii hore ka sii muhiimsan.

Soo-saaridan gaarka ah ee Maqaalka Arrimaha Aqoonta ayaa isu keenaysa waayo-aragnimada hawl-wadeenno ka kala socda qaar ka mid ah meelaha ugu adag uguna muhiimsan kuwaas oo maanta laga fulinayo Xalal Waara. Waxa aan rajeynayaa in wax-kala-faa'iideysiga ay halkaan ku wadaagaan uu gaari doonaan dhammaan kuwa doonaya in ay bilaabaan ama sii wadaan dedaallo la mid ah kuwan, iyo sidaas oo kale in ay su'aallo ka keenaan hababka aanu hadda adeegsano si loo raadiyo xalal hal-abuur ku dhisan oo islamarkaana sii wadno doodaha ku saabsan sidii Xalalka Waara looga dhigi mid xamaasad leh.
Waxa aan si daacad ah ugu mahadnaqayaa ka-qaybgalayaasha deeqsiyiinta ah ah ee kaga qaybqaatay maqaalladooda, oo aan aaminsanahay in ay maqaalladan  u xoojinayaan si qiimo leh. Waxa aan sidaas oo kale u mahad celinayaa dhammaan saaxiibada sida joogtada ah ii dhiirrigelinayey tan iyo markii aan ku soo biiray Concern horaantii sannadka 2019.

**Beatriz Valbuena**

# Isbedelka Xalalka Waara ee ka jira Soomaaliya

**Waxa qoray Peter de Clercq iyo Beatriz Valbuena**

Ilaa iyo sanadkii 2015, barakaca iyo Xalka waara ee Soomaaliya waxa xuddun u ahaa ajendeyaasha bina-aadamnimada iyo horumarka dalka. Waxa aanu aragnay in mowduuca barakaca uu si tartiib-tartiib ah uga gudbayo habka ku wajahan ilaalinta iyo bani'aadamnimada oo si sii kordheysa u noqonayo mid horumarineed. Dhowaan, ayaa waxa si guud loo aqoonsaday in barakacu uu si dhow ula xiriirro hannaanka magaalaynta aan la beddeli karin ee soo baxay oo aanu hadda bilownay in aan ka fekerno jihada xalalka barakaca ee xaaladda "qorsheynta degaamada" iyo "degsiimada aadanaha". Tirooyinka ayaa weli sii kordhaya oo dhacdooyinka cimilada (abaaraha/fatahaadaha) iyo colaad ayaa weli dadka guryahooda ka soo barakacinaya, oo inta badan ah hannaanka barakaca/magaalaynta aan la beddeli karin. In kasta oo aanu si wadajir ah u wadno dedaaladayada ugu wanaagsan, haddana saamayn ku filan kuma yeelan dhacdooyinka joogtada ah ee dadka hoygooda looga saarayo.

Intaa waxa sii dheer, wel ma awoodin in aan horumarino hannaan wadareed si "loo cabbirro is dhexgalka", haddii si kale loo dhigo go'aaminta ilaa iyo inta ay barnaamijyada Xalalka Waara awoodaan in ay yareeyaan tirada dadka isu arka in ay yihiin dad gudaha ku barakacay ama dareema in ay xaaladoodu sii wanaagsanaatay marka loo eego markii ugu horreysey ee ay soo barakaceen. Qaab cabbireed ayaa noqon lahaa alaad wanaagsan oo gacan ka geysata dhiirrigelinta isla-xisaabtan u dhaxeeya degaanka/maamulada dawladaha hoose iyo dadka soo doortay. Maqaal xiiso leh oo cinwaanka ah ayaa gadaal looga daray arrintan.

Maamulada degaanka waxa u cad in arrinta maaraynta barakacayaasha iyo Xalkeeda Waara ay tahay sidii loola tacaali lahaa kaalinta ay leeyihiin waardiyayaasha. Qaar ka mid ah qoraallo ay soo saareen la-hawlgalayaasha caalamiga ah, ayaa ku doodaya in waardiyayaasha ay waajib ku tahay in ay u hoggaansaan tilmaamaha iyo xeerarka hab-dhaqanka si ay u noqdaan "qayb ka mid ah xalka". Si kastaba ha ahaatee, waxa isbeddel weyn oo horumar lagu gaaro noqon lahaa qaadashada buuxda ee mas'uuliyad iyo isla-xisaabtan leh masuuliyiinta rasmiga ah ee ugu dhow dadweynaha.

Fikradeena Xalalka Waara ee Soomaaliya waa in lagu saleeyaa garashada in hannaanka magaalaynta ee hadda sida deg degga ah u socda ee sababta u ah barakaca in aanu gebi ahaanba ahayn "hannaan iska yimid". Gargaar bixinta iyo adeeg-bixinta wanaagsan ee magaalooyinka ka jirta ayaa dhiirrigelinaysa kororka in "magaalooyinka loo soo qaxo", gaar ahaan degmooyinka waaweyn.

Tiro badan oo ka mid ah barakacayaasha barakacooda daba-dheeraaday waa xoolo-dhaqato hore, oo xoolahoodii (yaraa) waayey oo danta ku khasabtay in ay magaalooyinka yimaadaan iyaga oo raadinaya hab-nololeed, ay ka mid tahay maciishad. Kuma noqon doonaan hab nololeedkoodii hore, maadaama aan laga yaabin in ay dib u bilaabaan dhaqashada xayn yar oo xoolo ah (waxa laga yaabaa in aanay rabin).

Marka adeeg bixinta iyo maciishadahaba loo daadejiyo ama la gaarsiiyo meelaha ka fog magaalooyinka waaweyn ee Soomaaliya (magaalooyin yar yar) ma awoodi doono oo keliya in aan joojino magaalaynta (oo ah wax si dhab ah uga jira caalamka oo dhan) balse waxa aan sidaas oo kale u maarayn doonaa si cabbir iyo ula kac ah.

Waxa weli jira isla-jaanqaadid la'aan weyn, xitaa marka la eego "natiijada" loo baahan yahay ee hannaanka Xalalka Waara. In "sida caadiga ah" diiradda la saaro saddexda ee Xal ee Waara ee xaaladaha qaxootiga (guryo-noqoshada, dib-u-dhexgelidda bulshada degaanka iyo dib-u-dejinta)

waa in lagu beddelaa fekerka "degsiimada aadanaha" ama "qorsheynta degaamada" taas oo fududaynaysa xalalka lagu raadinayo hab kala qaybqaybin yar.

Waxaa kale oo jira halis ah in fikradaha faraha ka batay ee la isla dhexqaadayo ee la halmaala galka barakacyaasha (Xalalka Waara, adkeysiga, ilaalinta bulshada) ay gacan ka geysantaan diirad saarid la'aan, ama ka soo horjeedka, in diiradda la saaro waxyaabo badan iyo hab qayb ahaan lagu gaari karo qaar ka mid ah mowduucyada ugu waaweyn iyo waxyaabaha mudnaanta koowaad u leh Soomaaliya.

Shaki kuma jiro in bani'aadamnimadu diiradda saarayso wax habboon oo lagama maarmaan u ah heerarka adkeysiga ee Soomaaliya ee aad iyo aad u hoosayseeya, iyada oo aan loo eegayn sida weyn ee loo maalgeliyey qoyska, bulshada, iyo heerka hay'adaha oo sii kordhaya. Dhowaan,dalka waxa mar kale aafeeyay fatahaado ku dhuftay kuwaas oo keenay in beesha caalamka ay diiradda saarto baahiyada deg degga ah. In kasta oo nasiib-darro tahay fatahaadahan in si aad ah loo saadaalin karo oo ayna soo noqnoqondeen, waxa ay gacan ka geystaan barakaca daba-dheeraaday.

Waxa Soomaaliya ka jira baahi muddo soo jirtey oo si joogto ah loogu qabo awoodaha maamarynta iyo isuduwidda musiibooyinka. Awoodan ayaan weli ka jirin, si kastaba ha ahaate, xaalad kasta oo deg-deg ah oo weyn wali waxa loola tacaali karaa hab dan gaar ah loo sameeyey oo keligii taagan.

Imminka si aan weligeed loogu baahan, ayaa waxa jira baahi ah in dib loo soo celiyo u-adkeysiga halista aafada maadaama dhacdooyinka bani'aadamnimada iyo aafooyinka ka jira dalka ay yihiin kuwo si buuxda loo saadaalin karo, marka la eego baaxadooda, goobta ay ka dhacaan iyo waqtiga ay dhacaanba. Arrintan ayaa waxa ay ka dhigan tahay in aynu haysano fursad ah in aan si weyn u maalgelino ka hortagga.

Beesha caalamku si ku filan uguma dedaalin in ay xiriir iyo iskaashi suuragal ah la yeelato waaxda gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya, sidaas oo ay tahay haddana waxa iska cad in waaxdani ay sii wadi doonto kaalinta muhiimka ah ee ay ka qaadato geedi-socodka horumarka, gaar ahaan bixinta adeegyada aasaasiga ah ee bulshada (sida caafimaadka, waxbarashada, korontada iyo biyaha) iyo dhiirrigelinta hab-nololeedka dalka ee la joogteyn karo. Kaalinta ay waaxda gaarka loo leeyahay ka qaadato in la helo Xalal Waara lagama badbadin karo.

Jawiga ganacsi ee hadda ka jira Soomaaliya waa mid aan wanaagsanayn, sidaas oo ay tahay haddana waxa jago weyni uga bannaan tahay maalgashadayaasha doonaya in ay halis badan qaataan / helaana faa'iido badan, taas oo ay tahay in deeq-bixiyeyaashu ay dhiirrigeliyaan. Gaar ahaan meelaha qaar sida maaraynta xoolaha (oo ay ka mid tahay habaynta(warshadaynta) hilibka), bulshooyinka xeebaha ku nool iyo waxqabadyo qiime ku kordhinaya, waxa aanu rajeynaynaa in deeq-bixiyayaashu ay awoodi doonaan in ay eegaan ka-qaybqaadashada maalgelinta iyo dhiirrigelinta shirkado ganacsi oo ay wada leeyihiin dawladda iyo ganacsato.

Waxa si sii kordheysa loo fahmayaa in wax-ka-beddelka "qandaraaska bulshada" ee u dhaxeeya dawladda Soomaaliya iyo muwaadiniinteeda in ay ku xirnaan doonto heerka fulinta iyo in lagala tashado ka-faa'iideystayaasha iyo maamulada ugu dhow deegaannada. Arrintan macnaheedu waa in kaalinta qaybaha kale ee dawladda federaalka sida dawlahada hoose iyo maamulada degmooyinka loo baahan doono in la xoojiyo, gaar ahaan halka ay khuseyso adeeg bixinta iyo bixinta caddaalad bulsho iyo mid duleed.


Ajandaha Xalalka Waara ayaa wuxuu ku baaqayaa xoojinta iskaashi heerar kala duwan leh oo u dhexeeya dawladda iyo la-hawlgalayaasheeda horumarinta iyo bani'aadamnimada, iyo sidaas oo kale waaxda gaarka loo leeyahay, oo ay ku midaysan tahay "gebi ahaanba dawladdu".
Si kastaba ha ahaatee, arrintani waxa ay u baahan tahay in lagu muujiyo "qaab dhammaan deeq-bixiyeyaasha" oo u baahan isuduwid iyo is-dhexgal ka dhexeeya ururo badan oo caalami ah.

> **"Waqtiga marnaba uma bislaanin in tallaabo isku-dhaf ah, wadajir ah, ballaaran, loo dhan yahay oo ay dawladdu-hoggaamiso loo qaado dhinaca Xalalka Waara ee dadka soo barakacay... Waa in aynan lumin fursaddan."**

Lafaguris ballaaran ah oo ay sameeyeen Bankiga Adduunka iyo kuwo kale ayaa hadda waxa si aan la dafiri karin loogu caddeeyay in barakacayaashu ay ku jiraan qaybta “kuwa ugu dambeeya ee laga tagey”. Waqtiga marnaba uma bislaanin in tallaabo isku-dhaf ah, wadajir ah, ballaaran, loo dhan yahay oo ay dawladdu-hoggaamiso loo qaado dhinaca Xalalka Waara ee dadka soo barakacay... Waa in aynan lumin fursaddan.

Arrintan la xiriirta Arrimaha Aqoonta ayaa waxaa fududeeyay Iskaashiga EIDACS[1], oo ka mid ah kuwa midowga yurub RE-INTEG ay maalgaliso ee loo yaqaan ‘Iskaashiga Xalka waara ee Soomaaliya. Hab-dhiska Xalalka Waara ee Soomaaliya waa mid ballaaran, oo ay ka mid yihiin iskaashiga kale ee Barnaamijka RE-INTEG kuwaas oo lagu muujiyey khariidadda hoose; Barnaamijka Xalka Waara ee Danwadaag, oo ay maalgeliso DFID[2] waxa hoggaamiya hay’adda IOM[3], halka hay’adda Concern ay tahay mid ka mid ah la-hawlgalayaashooda fulinta; DSP, oo ay maalgeliso DANIDA waxa hoggaamisa hay’adda Danish Refugee Council (DRC); iyo iskaashiyo badan oo ay Qaramada Midoobay wado oo ku jira maqaalka soo socda.

Khariidadda Barnaamijyada Xalalka Waara ee ReDSS RE-INTEG ee Soomaaliya




1. EIDACS: Sii-wanaajinta Dib-u-dhexgelinta bulshada ee Bulshooyinka uu Barakacu Saameeyay ee Soomaaliya

2. Waaxda Horumarinta Caalamiga ah ee Dalka Ingiriiska

3. Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka ee Qaramada Midoobay

# Dedaallada Xalalka Waara ee Soomaaliya

**Waxa qortay Teresa del Ministro**

Dadaalka Xalalka Waara (DSI) ayaa waxa la daah-furay sannadkii 2016 sidii dadaal wadajir ah oo ay hoggaamiyaan Dawladda Federaalka ee Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay.[1] Professor Walter Kaelin,[2] ayaa tan iyo 2015, waxa uu jihaynayey istiraatiijiyada dadaalka, wuxuna sidaas oo kale ku hagayey Ku Xigeenka Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM, ahna Isuduwaha Dhinaca Arimaha Bini'aadanimada (DSRSG/RC/HC) iyo hawl-wadeennada arrimaha mudnaanta dabaqidda hab-dhaqanka, macaahidda iyo heerka hawlgallada.

Waxa uu dadaalka ku qeexay sidan:

"Qaab wadareed waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka [kaas] oo ujeedadiisu tahay in uu naqshadeeyo, maalgeliyo una hirgeliyo Xalalka Waara sidii hab isku xiran oo iskuduwan. Waxa sidaas oo kale loola jeedaa in si wadajir ah loo hago hababka iyo mashaariicda khusayasa Xalalka Waara, iyo in la taageero awoodda dawladda ee heerka federaal, dawlad-goboleed iyo degaanada ay ku siiyo Xalalka Waara dadka gudaha ku barakacay, Qaxootiga soo guryo-noqdey iyo bulshooyinka martigelinaya."[3]

Dadaalka Xalalka Waara ayaa waxa uu ahaa kii ugu horreeyay oo noociisa ah oo bilaabay dhaqdhaqaaq lagu abaabulay daneeyayaal kala duwan sida jilayaasha ka shaqeeya arrimaha bani'aadamnimada, dhisidda-nabadda iyo horumarinta, kuna qasbay in ay wax ka beddelaan sida wax looga qabto arrimaha barakaca. Dalka Soomaaliya barakac ballaaran, daba-dheeraaday, oo ka jira magaalooyinka ayaa lagula tacaalayey faragelinaha bani'aadamnimo.[4] Curiye kale oo muhiim ah oo ka mid ah dadaalka Xalalka Waara waa culayska dhammaystiran ee la saarayo in dawladdu ay horseed ka noqoto faragelinaha loogu talagalay in lagula tacaalo barakicinta qasabka ah. Dadaalka ayaa markaa diiradda saaray mudnaanaha soo socda:

- Xaqiijinta xirmo qalab siyaasadeed ah si loo ururiyo mudnaanaha iyo cabbiro ay qaadaan wakiilada dawladdu si u taageeraan guryo-noqosho iyo dib-u-dejin khiyaari ah, ammaan ah oo sharaf ku dheedhan.[5]

1. Waxaa ugu muhiimsanaa oo gacan ga geystay Ra'iisul Wasaare Maxamed Cumar Carte iyo Ku Xigeenka Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM, ahna Iskuduwaha Dhinaca Arimaha Bini'aadanimada Peter de Clercq
2. Borofeesar Walter Kaelin ayaa ahaan jirey Ku Xigeenka Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u Qaabilsan Xuquuqda Dadka Gudaha Ku Barakacay, isaga oo dhiirrigelinayay Mabaadii'da Hageysa ee ku saabsan Barakaca Gudaha wuxuna horseed ka ahaa dadaalka lagu ansixiyay Qaabka Guud ee Guddiga Hay'adaha Ka Dhexeeya ee ku saabsan Xalalka Waara ee Dadka Gudaha Ku Barakacay. Wuxuu La-taliye Gaarka ah oo U Qaabilsan Arrimaha Barakaca Gudaha u ahaa QM DSRSG/RC/HC ee Soomaaliya tan iyo 2015. Borofeesar Kaelin u-qareemeeya caalami ah oo u dooda xalalka barakaca wuxuunna taageero siiyaa hawlgallo badan oo ka socda dalalka caalamka.
3. QM ee Soomaaliya, Dadka Soo Barakacay iyo Dadka Magaalooyinka deggan ee Saboolka ah Mar Dambe Gadaal Loogama Tagi Doono, 2019
4. Markii DSI la bilaabay sannadkii 2016 tirada shakhsiyaadka ku jira xaaladda barakaca khasabka ah hoos uma dhicin tan iyo mawjaddii ugu dambeysay ee soo haajiridda miyi-ilaa-magaalo ee sababta u ahayd abaartii 2011 ee ay ku dhinteen in ka bdan 250, 000 oo qof oo Soomaali ah. Sannadkii 2015 tirada dadka gudaha ku barakacay waxaa lagu qiyaasay in ay ahaayeen 1.1 mliyan, tiradana intaas ayay ahayd tan iyo 2013.
5. Waxa xusid mudan in gaar ahaan dadka gudaha ku barakacay ee soo qaxay goobaha magaalooyinka ah in ay si joogto ah u muujiyeen in ay doorbidayaan dhexgelinta bulshada degaanka.

- Yagleelidda iyo midaynta habka iskaashiga wasaaradaha ka dhaxeeya si kor loogu qaado hab dhammeystiran oo hannaanka dib-u-dhexgelinta bulshada.
- Ku baaqidda hab isku xiran oo loo dejiyo qorshaha mashaariicda gargaarka ee la siiyo dadka soo barakacay, iyada oo aan la eegayn oo keliya badbaadinta khayraadka maaliyadeed ee ku baxaya mashaariicda iyo barnaamijyada, laakiin iyada oo sidaas oo kale loo doodaayo shaqo-wadaag ballaaran oo guud ahaan isku-xira arrimaha la xiriira bani'aadamnimada, horumarinta nabadda.

Marka laga soo tago arrimaha qeexidda iyo staamaynta, mid ka mid ah guulaha laga gaaray dadaalku waa in la qaatay qodobadiisa guud, dib loo fasiray, la hirgeliyay oo yeesheen ururro kala duwan. Dhaqdhaqaaqyada iyo barnaamijyo aan si muuqata ugu xirnayn ddadaalada ayaa gacan ka geystay ujeeddooyinkiisa. Qaar ka mid ah heshiisyada, ayaa borofeesar Kaelin ugu qodobeyay xirmo toddobo warbixinood oo isla socda ah, ayaa waxaa tixgeliyey oo hirgeliyay dawladda, deeq-bixiyeyaasha, hay'adaha hawlgallada fuliya. Tusaale ahaan heerka dabiqidda, u-doodidda qaab-dhismeed qaran ayaa sababtay in la ansixiyo sannadkii 2019 Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga, Kuwa Soo Guryo-Noqdey Iyo shakhsiyaadka Gudaha Ku Barakacay. Maamulada iyo Ururka Caalamiga ah ee Horumarinta Sharciga (IDLO) ayaa soo abaabulay wadatashi ballaaran oo u dhexeeyay hawl-wadeennada ka shaqeeya Xalalka Waara, iyo kuwo kale. Kooxaha bulshada, ardayda jaamacadaha, ururrada shaqaalaha iyo wakiillada bulshada ayaa ku lug lahaa geedi-socodka oo dhan. DSI ayaa ku biirisay farsamo, u-doodid xoog lehiyo taageero loogu talagalay hannaanka daneeyayaasha badan kaas oo ugu dambeyntii, si ka duwan isku-dayadii hore, lagu guuleystay in la soo gebagebeeyo. Dawladda ayaa waxa ay xalalka Waara xudun uga dhigtay laba meerto oo isku xiga oo Qorshayaasha Horumarinta Qaranka ah.[6] Ugu dambayn, ka-dib markii la ansixiyey Bayaankii Kambaala, oo loo marayo taageerada hay'adda UNHCR, ayaa dawladdu waxa ay dardargelinaysaa qorshe sharci-dejin ah oo bayaanka lagu waafajinayo Sharciyada Qaranka.

6. NDP8 (2017/2019) ayaa cutub gaar ah u hurtay oo ku dhexjira Tiirka Adkeysiga. NDP9 ayaa u aqoonsan xalalka in ay ka mid yihiin arrimahiisa muhiimka ah ee "dhinac kasta taabanaya".

**" Mid ka mid ah guulaha laga gaaray dadaalku waa in la qaatay qodobadiisa guud, dib loo fasiray, la hirgeliyay oo yeesheen ururro kala duwan."**

Xaqiijinta habka iskaashiga ka dhaxeeya wasaaradaha ayaa suuragal ah in uu ahaa mid ka mid ah tallaabooyinkii ugu adkaa dadaalka, iyo mid muujiyey muhiimadda ay leeyihiin dhaqdhaqaaqyada dheeraadka ah ee lagu gaari karo. Qaab-dhismeedka macaahidda dawladda Soomaaliya ayaa lagu guda jirey samayntooda. Ilaa iyo markii la dhisay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya sanadkii 2012, ayaa waxa socdey wadahadallo joogto ah oo u dhaxeeya dawladda dhexe iyo maamul goboleedyada. Siddeedii sano ee la soo dhaafay waxa ay muujiyeen in horumar la taaban karo laga gaarey dhisidda iyo xoojinta dawladda. Si kastaba ha ahaatee, qeexidda waajibaadyada arrimaha dhinac kasta taabanaya sida Xalalka Waara ee xaaladda ay adag tahay in si tartiib-tartiib ah loo qeexo kaalimaha iyo mas'uuliyadaha hay'adaha dawladda. Dadaalka Xalalka Waara ayaa u doodayey hab wasaaradaha ka dhaxeeya iyo "isuduwid gudban", iyada oo la ogsoon yahay in xalal loo helo dib-u-dhexgelinta bulshada in ka badan 2.6 milyan oo qof oo gudaha ku barakacay, in ka badan 90,000 oo qaxooto soo guryo-noqdey ah iyo 30,024 oo isugu jira qaxooti iyo magangalyo doon[7] ay adag tahay in wax laga qabto oo ay si nidaamsan ula tacaalaan hay'adaha kala duwan oo Dawladda.[8] Waxa iyana la mid ah ku lug lahaanshaha qaybaha kala duwan ee ay ka mid yihiin xubnaha Dowlad-goboleedyada, Dawladda Federaalka, Golayaasha Degaanka ee Degmooyinka iyo maamulada xilku ka saran yahay. Waxa uu ahaa dadaal madax-bannaan oo ay waday hay'adda Danish Refugee Council oo lagu bixiyay taageero awood-dhisid oo ay u

7. Isha laga soo xigtay: UNHCR
8. Halka tirooyinka barakaca gudaha ay ka dhigan yihiin qiyaasaha dadka baracaka ee 2020, tirooyinka ku saabsan qaxootiga iyo magangalyo doonka waxaa soo xaqiijiyay hay'adda UNHCR. Cf. Cv-19 Qorshaha Wax-ka-qabashada iyo U-diyaar-garowga Dalka, 2020.

baahnayd Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Federaalka si loo taageero geedi-socodkan.

Ilaa iyo 2018, Agaasinka Xalalka Waara ayaa ka shaqeynayey hubinta sidii loo heli lahaa habab hay'adeed oo si gudban iyo si toosanba la isugu duwayo heer Federaal iyo degaanada kala duwan. Arrintan ayaa sabab u ahayd in sannadkii 2019 la daah-furo Xoghaynta Xalalka Waara. Waxa muhiim in la xuso bixinta iyo u doodidda hay'ad wasaaradaha ka dhexaysa oo uu bilaabay dadaal ay xuddun u ahaayeen dadaalkii lagu dhisay. Habkan waxa si isku mid ah u taageeraya madallo isuduwid muhiim ah oo ay hoggaamiso dawladda oo ah heer dawlad-goboleed iyo dowlaha hoose, kuwaas oo ka jira dawlad-goboleedyada Puntland, Hirshabelle, Galmudug, Jubaland, Koonfur Galbeed iyo Gobolka Benaadir. Waxa muhiim ah iskaashiga u dhaxeeya hababkan maamul in uu sii u socdo iyo in wadahadalka fiican ee hay'adaha u dhaxeeya uu hagayo qaybo muuqda oo kaalimaha iyo masuuliyadaha hay'adahan ah.

Hindisaha waxa waday dadaallo xooggan oo lagu abaabulayo khayraadka. Ilaa 2016, ku dhowaad 90 milyan oo doolarka maraykanka ah ayaa loo qoondeeyay mashaariicda iyo barnaamijyada la xiriira Xalalka Waara. Marka laga reebo in yar, mashaariicdan badankoodu waxa ay ahaayeen dadaallo ay si wadajir ah u wadeen hay'adaha Qaramada Midoobay iyo NGO-yada. La-hawlgalayaasha hirgelinta gaar ahaan ayaa waxa ay horumariyeen mashaariic looga dan leeyahay dib-u-dhiska kalsoonida u dhaxeysa maamulada iyo bulshooyinka soo barakacay - kuwaas oo badanaa fursado xaddidan ku leh ka qaybgalka arrimaha dadweynaha/dawladda. Iyada oo heerar kala duwan ah, ayaa la-hawlgalayaasha dawladdauku soo dareen, iyaga oo u samaynaya mas'uuliyaddo hirgelinta barnaamijyada. Arrintan ayaa waxa lagu dabaqayaa dhammaan barnaamijyada Xalalka Waara iyo gaar ahaan Midnimo 1 iyo 2, mashaariicda Iskaashiga EU RE-INTEG, Xalka Waara, iyo Danwadaag.[9]

La-hawlgalayaasha ayaa sii waday taageerada iyaga oo u maraya xalal hore iyo dadaallo horumarineed oo dhammaan ah arrimaha mudnaanta koowaad oo muhiim u ah dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka iyo dib-u-dejin kuwa soo guryo-noqdey, laakiin sidaas oo kale helidda xuquuqo iyo ilaalin. Kuwan ayaa la tacaaley arrimaha nabadgelyada, adeegsiga dhulka, waxbarashada, guryaynta, adeegyada aasaasiga ah, biyaha, caafimaadka (caafimaadka jirka iyo dhimirka), taageerada ka dhanka ah tacaddiga ku salaysan jinsiga iyo kan galmada iyo taageero ganacsi abuur, shaqaalayn iyo la shaqaalayn karo. Hawlgalladooda shaqo, gaar ahaan la-hawlgalayaasha NGO-yada ayaa waxa ay ka faa'iideen barashada joogtada ah taas oo ay kor u qaaday oo ay xoojisay Xoghaynta Xalalka Waara ee Gobolka. Hay'addan ayaa muhiim u ah xaqiijinta in si fiican loo fahmo qiirooyinka iyo nuglaanta shakhsiyaadka soo barakacay iyo sidaas oo kale in faragelinaha la waafajiyo Qaab-dhismeedka Guddiga Hay'adaha Ka Dhexeeya / Inter-Agency Committee Framework (IASC) ee Qaabilsan Xalalka Waara – waxa aan u mahad celinaynaa faahfaahinta cabbirrada dhinacyada duleed, sharci iyo bedqabka maadiga ah.

Caqabadda ugu weyn ee hortaagan dhammaan daneeyayaasha iyo ururrada taageera Xalalka Waara waa sidii lagu xaqiijin lahaa taageerada dib-u-dhexgelinta bulshada ilaa heer. Taageerada barnaamijyada kala duwan ay bixiyeen sanadahii la soo dhaafay ayaa lagu qiyaasayaa in barakacayaasha Soomaaliya gaareen in ka badan 1 milyan, taas oo ah kala bar tirada dadka xaaladoodu walaacu ka taagan tahay. Waxa intaa dheer, si loo gaaro dhammaan Soomaalida uu aafeeyay barakaca, waxa kale oo muhiim ah in taageerada horey loo bixin

---

9. Midnimo waa mashruuc bilowgii ugu horreeyay hay'adaha IOM iyo UN Habitat ay ka fuliyeen Dowlad-goboleedyada Jubbaland iyo Koonfur Galbeed. Wejigiisii labaad UNDP ayaa ku soo biirtay iskaashiga oo saddexda hay'adoodba waxay hadda ka hawlgalaan Dowlad-goboleedyada Hirshabelle iyo Galmudug. Mashruuca wuxuu maaliyado ka helaa Barnaamijka Nabad-dhisidda QM, Jabaan, iyo Sanduuqa UN Trust Fund ee Bedqabka Aadanaha. Xalalka Waara waa barnaamij ay fuliso DRC oo maaliyado ka helaysa DANIDA. Danwadaag, waa barnaamijka Xalalka Waara oo ay maalgeliso DFID waxaana fuliya IOM, NRC, Concern iyo ReDSS. Barnaamijka EU RE-INTEG wuxuu ahaa qoondaha maaliyadeed ee saddex natiijooyin. was a fund allocation across three results. Marka laga hadlayo xalalka, waxaannu tixgelin doonaa natiijada 2aad iyo 3aad ee lagu arkay mashruucda ay guud ahaan dalka Soomaaliya ka fuliyeen la-hawlgalayaal qaran iyo kuwo caalami ah oo kala duwan. La-hawlgalayaashan waa: Worldvision Concern, CARE, NRC, CESVI, GREDO, Jubba Foundation, SWDC, UN Habitat, UNHCR, UNDP, Sido, IDLO

jiray meesheedii laga sii wado ilaa iyo inta ay ka dhammaanayso baahida ay barakacayaashu u qabaan ilaalinta gaarka ah ee la xiriirta xaaladooda ilaa uu ka dhammaado takoorka ku salaysan barakacooda. Kuwani waa geed-socodyo muddo dheer soconaya oo u baahan in bulshada oo dhan ay garwaaqsato raadadkii ay ku reebeen colaadaha sodon sano jirsadey iyo cawaaqib-xumadooda. Waxa ay u baahan tahay maaliyad-siin ku habboon oo la joogteyn karo si loo hubiyo in barakacayaashu weli ka mid yihiin kooxaha nugul ee dalka in ay muddo ka-dib helaan xirfado, kharyaad iyo fursado ay uga mid noqdaan bulshada caadiga ah iyo in ay si loo siman yahay u lehaan xuquuqo iyo adeegyo. Waxa loo baahan yahay in qaybaha kala duwan ee Soomaalidu ay u midowdo sidii suuragal looga dhigi lahaa dib-u-dhexgalka meelahan oo dhan: xafiisyada dawladda, goobaha shaqada,dugsiyada iyo jaamacadaha, maxkamadaha, iyo bulshooyinka. Beesha caalamka ayaa waxa looga baahan yahay ka-qaybgal joogto ah iyo xaalad-waafajin si wax looga beddelo hababka maaliyad-siinta iyo hirgelinta qaababka faragelinaha muddada dheer, si loo maalgeliyo waaxaha istiraatiijiga ah ee u badan in maaliyad joogto ah laga helo si loogu maalgeliyo geedi-socodka xalalka iyo in si aad iyo aad ah loola socdo guud ahaan raadadka uu waxqabadkoodu ku reebay yaraynta barakicinta qasabka ah. Tusmada Dib-u-dhexgelinta Bulshada ee degaanka ah ee ay tijaabisay Danwanaag waa tallaabo jihadaasi loo qaaday, balse dadaalladan ayaa loo baahan yahay in la xoojiyaa oo la kordhiyo.

Iyada oo mustaqbalka laga rajo qabo in dadaalku uu ku soo idlaado in uu u wareego dhaqdhaaq qaran ama mid bulsho oo ay si buuxda Soomaalidu u leeyihiin, la-hawlgalayaashu waa in ay diiradda saaraan sidii ay dhidibada Xalalka Waara ugu aasi lahaayeen bulshada dhexdeeda, iyaga oo ku dhiirrigelinaya shabakadaha mideeya Soomaalida in ay si joogto ah u dalbadaan isbeddel siyaasadeed, fal axsaanfal/u roonaan ah, iyo adeeg bixin. Barakacaayaasha waxa looga baahan yahay in ay iyagu horseedaan xalalkooda, marka ay sidaa samaynayaana waxa ay u baahan doonaan taageerada bulshooyinka martigelinaya, dawladaha iyo la-hawlgalayaasha caalamiga ah. Deegaamaynta faragelinta xalalka, in loo doodo siyaasado miisaaniyadeed oo heer qaran ah ayaa noqon doonta tallaabada xigta ee aasaasiga ah si loo xoojiyo hannaanada isla-xisaabtanka ku wajahan ee bushooyinka uu barakacu saameynta ku yeeshay. Dal aanay weli si buuxda uga hana qaadin doorashooyin hal-qof-hal-cod ah tan iyo markii uu dagaalka sokeeye ka qarxay, ayaa waxa muhiim ah in la taageero ka-qaybgalka ay barakacaayaashu ka qaybgalayaan arrimaha dawladda iyada oo la xaqiijinayo isla-xisaabtanka bulshada in uu sidaas oo kale keeno isla-xisaabtan siyaasadeed xilliga geedi-socodyada doorashooyinka guud. Iskaashi in lala yeesho waaxda gaarka loo leeyahay, barakacayaasha in lagu daro barnaamijyada shabakada bedqabka qaran, dhiirrigelinta in shirkaduhu ay mas'uuliyad iska saaraan arrimaha bulshada iyo ugu dambeyntii in la kordhiyo awoodda fulinta ee ay dawladdu u leedahay bixinta la kaabo ee adeegyada ay waaxaha gaarka loo leeyahay u fidiyaaan kooxaha nugul waa tallaabooyinka dheeraadka ah oo ay tahay in la taageero si loo kordhiyo saamaynta ay faragelinahan.

# Casharadii laga bartay Iskaashiga Qaabilsan Xalalka Waara ee Barnaamijka EU RE-INTEG

**Waxa qoray Rufus Karanja iyo Beatriz Valbuena**

Sanadahii la soo dhaafay, isbedelka siyaaasadeed iyo heerarka siyaasadeed ee Xalalka Waara ayaa waxa la waafajiyey ballaarinta kala duwanaanta iyo baaxadda barnaamijyada Xalalka Waara ee ka jira Soomaaliya. Barnaamijka loo yaqaano RE-INTEG ee uu Midowga Yurub Maalgeliyo waa barnaamij sanado badan soconaya oo diiradda lagu saarayo dib-u-dhexgelinta bulshada ee dadka gudaha ku barakacay iyo kuwa soo guryo-noqdey ee Soomaaliya, kaas oo bilowday 2017 oo soo idlaan doonaa 2020. RE-INTEG waxa ku xigay laba barnaamij oo kale oo diiradda lagu saarayo Xalalka Waara ee Soomaaliya: Danwadaag[1] iyo Barnaamijka Xalalka Waara[2] (DSP), oo ay DFID iyo DANIDA u maalgeliyaan sida ay u kala horreeyaan[3].

Maqaalkani waxa uu ku salaysan yahay diiwaangelinta casharadii la bartay oo ay sameysay Xoghaynta Xalalka Waara ee Gobolka (ReDSS) oo ahayd la-hawlgalaha barasho ee Iskaashiga NGO saddexda ahi ay hoggaamiyeen RE-INTEG: Iskaashiga Xalalka ee Jubbaland (JSC); Sii-wanaajinta Dib-u-dhexgelinta bulshada ee Bulshooyinka uu Barakacu Saameeyay ee Soomaaliya (EIDACS); iyo iskaashiga Xalalka Waara ee Somaliland (SDSC). Saddexdan Iskaashi waxa ay qaateen hab ku jihaysan xalal iswaafaqsan. Afar natiijo oo diiradda lagu saarayo ka-qaybgalka bulshada, helidda adeegyada aasaasiga ah, maciishadaha, iyo cilmi-baaris iyo barasho-ayaa la qaatay. Horumarka laga gaaro natiijooyinka ayaa lagu cabbiraa 10 cabbir oo heerka-natiijada IASC ah oo ku saleysan Qaabka Guud ee Xalalka Waara ee ReDSS.

Ujeeddada warbixinta laga lahaa waxa ay ahayd in la diiwaangeliyo barashada iyo hab-dhaqanka rajada wanaagsan ee ay bixinayeen barnaamijyada EIDACS, JSC iyo SDSC ee waxyaabahan soo socda: 1) Istiraatiijiyadda iyo habka, oo ay ku jiraan adeegsiga cabbirrada IASC; 2) Qaab-dhismeedyada maamulka Iskaashiga iyo isuduwidda ka dhaxeeya iskaashiyada iyo midka gudahooda ah; 2) Ka qaybgelinta daneeyayaasha Xalalka Waara ee muhiimka ah, gaar ahaan wakiillada dawladda iyo bulshooyinka uu barakacu saameeyay (DACs); iyo 4) barashada iyo xaalad-waafajinta mashruuca. Casharrada muhiimka ah ee la bartay iyo hab-dhaqanada rajada wanaagsan muujiyey ayaa la aqoonsaday iyada oo loo marayo baaritaanka/dib-u-eegista hordhaca ah ee lagu sameeyo dokumentiyada muhiimka ah ee barnaamijka iyo dokumentiyada debedda ee ku habboon, iyo 20 wareysiyo xog-ogaal muhiim ah oo lala yeeshay daneeyayaasha barnaamijka, oo ay ka mid yihiin la-hawlgalayaasha hirgelinta iyo barashada ee RE-INTEG, Midowga Yurub, wakiillada dawladda, iyo la-hawlgalayaasha ka socda Iskaashiyada kale ee Xalalka Waara. Barashada loo aqoonsaday in ay qayb ka tahay hannaankan loogu talagalay in ay ka warbixiso barnaamijyada diiradda lagu saaro xalalka socda iyo kuwa mustaqbalka ee ka jira Soomaaliya iyo guud ahaan gobolka.

1. Dalladda xalalka oo ay IOM-hoggaamiso oo la-hawlgalaya hay'adaha Norwegian Refugee Council (NRC), Concern, Shabelle Community Development Organization (SHACDO), Juba Foundation iyo ReDSS
2. Barnaamijka xalalka oo ay DRC/DDG-hoggaamiso oo la-hawlgalaya WYG iyo ReDSS.
3. U noqo khariidadda ku taalla bogga 5



Caasha waxa ay ku nooshahay magaalada Baydhabo waana dhibbane dhawr jeer hoygeeda si qasab ah looga soo saaray, 2019. Sawir-qaade: Cabdirisaaq Aaden Axmed / NRC.

## Casharrada laga bartay barnaamijyada EIDACS, JSC iyo SDSC

### *Istiraatiijiyadda iyo habka*

1. Dejinta barnaamijyada Xalalka Waara ayaa suuragelin kara hab la isuduwey oo wax looga qabanayo barakaca kaas oo tiir u ah isku xirka arrimaha bani'aadamnimada-horumarinta-nabadda/dawlad dhisidda. Barnaamijka Midowga Yurub ee RE-INTEG ayaa abuuray fursad wada-shaqeyn sii korortay oo u dhexaysa dhinacyada ka shaqeeya arrimaha siyaasadda, bani'aadamnimada iyo horumarinta iyada oo la isku dayayo in loo doodo horumarinta iyo dib-u-dhexgelinta bulshada oo taageerayo horumarinta degaanka ku salaysan.
2. Habka degaanka ku salaysan waxa uu ku tiirsan yahay hubinta isuduwidda iyo si fiicaan ula shaqaynta ururrada iyo barnaamijyada kale ee ka hawlgala gudaha degaanka juqraafi ahaan la qeexay si wax looga qabto caqabadaha bulsho, dhaqaale iyo kuwa siyaasadeed iyo fursadaha jira. Barnaamijka diiradda saaraya xalalka gaarka ah looma baahna in uu wax-ka-qabto dhammaan baahiyada iyo nuglaanta gaarka u ah barakaca ee gudaha degaanka laga hirgelinayo, hase yeesee, waxa muhiim ah in la fahmo qorsaeynta iyo faragelinaha jira, nusqaamaha la buuxin karo, iyo fursadaha looga doodi karo xalalka la qaadi karo.
3. Barnaamijyada Xalalka Waara waa in ay si wax-ku-ool ah ula shaqeeyaan barnaamijyada adkaysiga ee ka jira degaamada miyiga ah, oo waa in ay dhiirigeliyaan dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka ee degaamada magaalooyinka ah iyo, halka xaaladda amniga ay saamaxayso, guryo-noqoshada iyo dib-u-dhexgelinta bulshada degaamada miyiga oo khiyaari ah, ammaan ah oo sharaf ku dheedhan.
4. Barnaamijyada diiradda saara xalalka waara waa in ay leeyihiin aragti cad oo beddel ah, taas oo muujinaysa dariiqa sababta u noqon kara horumarinta dib-u-dhexgalinta bulshada iyo wax-ka-qabashada nuglaanta guud ahaan bulshooyinka uu barakacu saameeyay.

5. Cabbirrada IASC ayaa adeegsan kara qaab guud oo caqligal ah, balse marka sidaa la sameynayo waa in xaaladda la waafajiyaa oo si cad loo qeexo. Borotakool cad oo loogu talagalaya in xogta loo kala-saafo si waafaqsan xaaladda barakaca ayaa sidaas oo kale muhiim ah si loo fahmo baaxadda ay gaarayaan nuglaanta barakaca gaarka ah iyo sida ay arrintani isu beddesho muddo ka-dib.
6. Waxa aan jirin caddayn iyo isku raacid u dhaxaysa hawlwadeenada Xalalka Waara oo ku saabsan waxa shaqeeya iyo waxa aan shaqayn ee hannaanka cabbiridda iyo kormeerka horumarka laga gaaray dhinaca dib-u-dhexgelinta bulshada.
7. Barnaamijyada Xalalka Waara ee la dejinayo waa in ay taageeraan dadaallada lafagurista iyo ururinta xogta ee diiradda saaraya barakaca, waana in ay dhiirrigeliyaan lahaanshaha dawladda ee dadaalladan.

## *Maamulka Iskaashiga*

1. In ay iskaashi ahaan u shaqeeyaan hay'adaha ayaa u oggolaanaysa in ay bixiyaan waxqabadyo guud, oo qaybo badan oo dhinaca barakaca ah, iyo in ay habab ku salaysan degaanka ka hirgeliyaan bulshooyinka uu barakacu saameeyay. Iyagga oo isu geynaya khibradahooda, ayaa la-hawlgalayaasha iskaashigu waxa ay awoodayaan in ay bixiyaan barnaamijyo qaybo badan ka kooban, oo diiradda lagu saarayo maamulka degaanka; guryaynta, dhulka iyo hantida (HLP); biyaha, fayodhawrka iyo nadaafadda (WASH); waxbarashada; caafimaadka; ilaalinta; iyo awoodsiin dhaqaale.
2. Maalgelin ku filan ayaa loo baahan yahay in la geliyo qaab-dhismeedyada maamulka iskaashiga si loo xaqiijiyo in guud ahaan la iswaafajiyo hababka hay'adaha, kordhiyo awoodaha iyo saamaynta guud ahaan ee qaybaha, barasho dhinac kasta taabanaysa, iyo in kormeer iyo qiimayn xoogan lagu sameeyo barnaamijyada.
3. Fursad ayaa loo baahan yahay in la abuuro si loo helo ku lug lahaanshaha macnaha leh ee ururrada qaranka/degaanka ah ee ka shaqeeya arrimaha horumarinta iyo bani'aadamnimada naqshadaynta iyo hirgelinta barnaamijyada diiradda saaraya xalalka. Saddexda NGO-yo ee la-hawlgalayaal degaanka ah- GREDO, Juba Foundation, iyo TASCO- ayaa waxa ay keeneen khibrad muhiim ah, aqoonta degaanka, xiriirrada bulshada oo xoogan, iyo gaarista degaannada ee iskaashiyada.

## *Ka-qaybgalka Bulshada*

1. Barnaamijyada Xalalka Waara waa in ay raadiyaan adeegsiga iyo in lagu saleeyo waxa horey u jirey. Khariidadayn ballaaran oo qaab-dhismeedyada bulshada waa in bilowga hore la sameeyaa oo faragelinaha lagu saleeyaa awoodaha iyo kooxaha jira, iyo qorsheyaasha kooxahan. Waa in sidaas oo kale la sameeyaa dadaallo kooxaha bulshada iyo qorsheyaashooda loogu xiriirinayo gedi-socodyada kale ee qorshaynta.
2. Naqshadda barnaamijka waa in lagu daraa debecsanaan si loo suurageliyo in faragelinuhu in ay u horseedaan arrimaha mudnaanta koowaad u leh bulshada. Hirgelinta qorshe-hawleedyada bulshada (CAPs) ee barnaamijyada xalalka mustaqbalka ayaa waxa ay ka faa'iidi doonaan debecsanaanta badan oo gudaha naqshadda barnaamijka ah, oo ogolaanaysa in wax-ka-beddel lagu sameeyo hawlaha iyo qoondaymaha miisaaniyadda ku salaysan arrimaha mudnaanta koowaad leh ee ay aqoonsadeen bulshooyinku.
3. Barnaamijyada Xalalka Waara waa in ay abuuraan fursado ay bulshooyinka iyo daneeyayaasha muhiimka ahiba uga qaybgali karaan wadahadallada, wada-shaqaynta iyo qorshaynta wadajirka ah. Arrintan ayaa waxa uu muhiim u yahay dokumentiyada buuxa qorshe-hawleedyada bulshada (CAPs) iyo in qorsheyaashan lala wadaago dawladda, daneeyayaasha ka shaqeeya hawlaha bani'aadamnimada iyo horumarinta ee ay khuseyso. Marka la eego Danwadaag, dokumentiyada qorshe-hawleedyada bulshada (CAPs) ayaa lagu dhafi doonaa qorshayaasha heer-degmo, hannaan ujeeddadiisu tahay xaqiijinta qorshayn loo dhan yahay oo ku salaysan baahiyada bulshooyinka uu barakacu saameeyay (DACs)[4].

---

4. Macluumaad laga helay dokumenti muujinaya xiriirka ka dhaxeeya Danwadaag/RE-INTEG, oo ay soo saareen la-hawlgalayaas Danwadaag.

4. Isla-xisaabtanka bulshooyinka uu barakacu saameeyay waa in la sameeyaa iyada oo mudnaan la siinayo nidaamka habsami-u-socodka macluumaadka ee labada-dhinac ah.

## *Ka-qaybgalka Daqwladda*

1. Ka-qaybgalka hore ee dhammaan heerarka dowladda, gaar ahaan marxaladda naqshadaynta, ayaa lagama maarmaan ah si loo helo ogolaanshaha dawladda iyo ka-qaybgalkeeda joogtada ah.
2. In la gaaro Xalal Waara ayaa waxa ay ku xiran tahay in qaybaha kala duwan ee dawladdau ay leeyihiin karti ku filan, rabitaan, iyo khayraad si ay u hogaamiyaan hannaanada Xalalka Waara; haddaba marka la naqshadaynayo barnaamijyada Xalalka Waara waa in arrintan maanka lagu hayaa. Barnaamijyada Xalalka Waara ee mustaqbalka waa in ay marxaladda naqshadaynta si iskaashi leh uga qaybgeliyaan dhigooda dawladda ee muhiimka ah si loo diyaariyo istiraatiijiyad wadajir ah oo lagu sii wanaajinayo kartida dawladda oo leh cabbirro gaar ah iyo calaamado dhacdooyinka horumarka muhiimka ah.
3. La-socodka/kormeerka iyo hogaaminta dawladda ayaa loo baahan yahay in la dhiirrigeliyo oo la taageero inta ay hirgelintu socoto oo loo marayo habab kala duwan. iskaashiyada EIDACS, JSC iyo SDSC ayaa dawladda ka qaybgaliyey hirgelinta hawlo gaar ah oo ay ka mid yihiin barnaamijka, Guddiga Jihaynta/Hagidda Mashruuca iyo kulamada Kooxda Farsamada Shaqada, tababarrada diiradda lagu saarayo xalalka, iyo iyaga oo la wadaagay dokumentiyada mashruuca, miisaaniyadaha iyo qorshe-hawleedyada. Intaa waxa dheer, in hannaanka kormeerka wadajirka ah ay wasaaradaha ay khuseyso ka qaybgeliyeen hannaanka la-socoshada barnaamijka waxayna kordhiyeen la-xisaabtanka la-hawlgalaha.

## *Barashada iyo Xaalad-waafajinta*

1. Hannaanada barashada iyo xaalad-waafajinta waa in la dhexgeliyaa naqshadda mashruuca, iyada oo kaalimaha, mas'uuliyadaha iyo hannaanka si cad loo qeexayo.
2. La-hawlgale barasho in uu qayb ka ahaado iskaashiga ayaa qiimo weyn ku dari karta marka laga eego dhinaca keenidda waxbarasho, awood dhisid, iyo abuurista fursad looga wada hadlayo Xalalka Waara. Ka jawaabayaasha ayaa iftiimiyey in ReDSS ay qiime ku kordhisay barnaamijyada marka laga eego dhinaca gacan ka geysashada aqoonsashada cansharrada la bartay; ku xiriirinta iskaashiga hawlwadeenada kale ee Xalalka Waara ee muhiimka ah; dhisidda aqoonta iyo kartida; bixinta hagid ku saabsan mabaadii'da barnaamijyada; iyo gacan ka geysashada abuurista himilo guud.
3. Waa in habab badan la qaataa si loo ogaado oo barashada loogu adeegsado barnaamijyada xalalka waara. Dhawr hab-dhaqan barasho barnaamijka gaar ku ah, oo rajo fiican bixinaya ayaa waxa qaatay Iskaashiyada EIDACS, JSC, iyo SDSC oo ay ka mid tahay in dawladda lala sameeyo kormeer wadajir ah, kulamo dib-u-eegis sannadle ah, ogaanshaha sheekooyinka guusha ee gaarka ah, iyo diyaariynta dokumentiyada casharradii la bartay.
4. Debecsanaanta waa in la dhexgeliyaa naqshadda barnaamijka, si loo xaqiijiyo in barashadu ay u horseedo barnaamijyada si habboon oo taabogal ah oo la waafajiyey xaaladaha. Debecsanaantu ma go'aamiyaan oo keliya deeq-bixiyeyaasha iyo shuruudahoodu. Waxa ay sidaas oo kale khusaysaa hay'adaha gaarka ah iyo iskaashiyada go'aaminaya heer debecsanaan iyaga u gaarka ah marka la eego dhinacyada shaqada iyo goobaha laga hirgelinta. Barnaamijyada Xalalka Waara ee mustaqbalku waa in ay tixgeliyaan oo ay ka fiirsadaan arrimahan inta lagu guda jiro marxaladda naqhadaynta, deeq-bixiyayaasha iyo hay'adaha hirgelinayaa waa in ay isku raacaan baaxadda ay gaarayso iyo dabciga debecsanaanta. Hababka waa in ay ku jiraan tijaabinta habab kala duwan; maalgelinta lafagurista colaadda; in la qoondeeyo waqtiga la qabanayo kulamada dib-u-milicsiga casharradii la rabtey oo muddo ka-diba mar la qabto; iyo maalgelinta hababka isla-xisaabtanka bulshada uu barakacu saameeyay (DAC).

## Gebagabo

Intii la aqoonsanayay casharradii laga bartay barnaamijyada EIDACS, JSC iyo SDSC, ayaa waxa la aqoonsaday dhawr meelood oo ay cillado ka jireen. Cabbirrada IASC ayay ahayd in xaaladda la waafajiyo, la qaato oo si cad loo qeexo, oo habab jaango'an oo lagu cabbirayo ayay ahayd in lagu diyaariyo marxaladda naqshadaynta. Waxa ay ahayd in maalgelin dheeraad ah la geliyo qaab-dhismeedka maamulka iskaashiga. Guud ahaan saddexda barnaamij ay leeyihiin Qaybta Maaraynta Iskaashiga (CMU) oo si wadajir ahaan ah loo sameeyo ayaa gacan ka geysan lahayd iswaafajinta hababka, isdhexgelinta qaybaha iyo dhinacyada barnaamijka ee kala duwan, suuragelinta barasho dhinacyo badan taabanaysa, iyo jaangoynta hababka lagula socda cabbirrada natiijada. In kasta oo daneeyayaasha dawladdu ay barnaamijyada si waxtar leh uga qaybgaleen, haddana ma jirin istiraatiijiyad si cad u qeexan oo ku saabsan ka-qaybgalka iyo dhisidda kartidda ee heerarka kala duwan ee dawladda. Intaa waxa dheer, hababka ka qaybgalka bulshada iyo horumarinta qorshe-hawleedka bulshadu (CAP) in ay ahaayeen kuwo burbursan oo aan dhammayn, qorshe-hawleedyada bulshada (CAPs) ayaa badanaaba laga soocay hawl-wadeenada kale.

In kasta oo ay arrintani jirto, ayaa haddana iskaashiyada barnaamijku RE-INTEG waxa ay awoodeen in ay ka gudbaan barnaamijyada bani'aadamnimada muddada-gaaban oo dhaqanka ah, iyo in ay keenaan hab diiradda saaraya adkaysiga- iyo horumarinta si ay wax uga qabtaan barakaca. La-hawlgalayaasha iskaashiyada ayaa waxa ay bixinayeen barnaamijyo qaybo badan ka kooban oo lagu horumariyay cunsurrada badan ee dib-u-dhexgelinta bulshada. Intaa waxa dheer, dabciga qaybaha badan/ururrada badan ee barnaamijyadu in uu gacan ka geystay hirgelinta hababka degaanka ku salaysan, iyo in uu abuuray nefis dheeraad ah oo ay barnaamijyadu kaga qaybgalayaan si iskaashi leh wakiillada dawladda iyo bulshooyinka halkii loo arki lahaa in ay yihiin hay'ado keli ah. Waqtiga barnaamijka ee 3-sano ah ayaa sidaas oo kale bixiyay fursado sii kordhaya oo barashada iyo xaalad-waafajinta. Midowga Yurub ayaa ku muujiyey hogaaminta deeq-bixiyayaasha maalgelintiisa Xalalka Waara ee loo marayo Banraamijka RE-INTEG. Arrintan ayaa horseeday in maalgelin dheeraad ah laga helo DFID iyo DANIDA oo lagu maalgelinayo barnaamijyada Xalalka Waara, ee Danwadaag iyo Barnaamijka Xalalka Waara. Faragelinahani waa kuwo wax looga baranayo, lagu dhisayo, oo lagu kordhinayo waxqabadyada, dadaallada, iyo qaab-dhismeeyada uu dejiyay barnaamijka RE-INTEG.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daraasado xaaladeed gaar u ah iskaashiyada RE-INTEG, fadlan hoos ka eeg:

- Dhisidda iyo taageeridda ganacsiyo yar yar oo loogu talagalay bulshooyinka uu barakacu saameeyay: daraasad xaaladeed ay sameysay Iskaashiga EIDACS ee Dowlad-goboleedka Koonfur Galbeed
- Ilaalinta xuquuqaha Guryeynta, Dhulka iyo Hantida ee bulshooyinka uu barakacu saameeyay: daraasad xaaladeed ay sameysay Iskaashiga Xalalka Waara ee Jubbaland
- Kordhinta helidda kaydka iyo Amaahda bulshooyinka uu barakacu saameeyay: daraasad xaaladeed ay samaysay Dalladda Xalalka Waara ee Somaliland

# Cabbiridda Horumarka Laga Sameeyey Xalalka Waara

Waxa qortay Lena Von Naso

## Barakaca iyo Xalalka Waara

Ee ka jira Soomaaliya, dad tiradoodu lagu qiyaasayo 2.6 milyan ayaa hadda la joogo ku barakacsan gudaha dalka. Ururro badan oo bani'aadamnimada ka shaqeeya ayaa ka shaqaynaya in ay wax ka qabtaan baahiyaha deg degga ah ee ka dhashay barakacan. Waxqabadkan waxa barbar socda, in hawlwadeenada Xalalka Waara, sida Iskaashiga Danwadaag ee Xalalka Waara, ay ka shaqaynayaan sidii loo heli lahaa xalal muddo dheer. In lagu dadaalo sidii loo gaari lahaa Xalal Waara waxa loola jeedaa in si tartiib-tartiib ah loo yareeyo baahiyada iyo nuglaanta bulshooyinka uu barakacu saameeyay (DAC), iyada oo la xoojinayo adkaysiga iyo isku-kalsoonaantooda, sidaas daraadeed barakacayaasha ayaa si sii kordheysa u helaya xuquuqahooda aadamaha oo aan lahayn takoor ku salaysan barakacooda. Hadafka ugu dambeeya ee laga leeyahay dhammaan hannaanka Xalalka Waara waa dib-u-dhexgelinta bulshada oo la joogtayn karo.

## Cabbiridda dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka iyada oo la adeegsanayo tusmo

Barnaamijyada Xalalka Waara ayaa waxa haga Qaabka Guud oo Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Ka Dhexeeya (IASC) ee ku saabsan Xalalka Waara ee Shakhsiyaadka Gudaha Ku Barakacay iyo ilaa beri-dhoweyd Qaabka Guud oo Xoghaynta Xalalka Waara ee Gobolka (ReDSS). Si kastaba ha ahaatee, ma jirto hagid ballaaran oo ku saabsan sida loo cabbiro horumarka laga gaaray Xalalka Waara ama dib-u-dhexgelinta bulshada ee Soomaaliya. Danwadaag waxa ay sameeyey Tusmada Dib-u-dhexgelinta Degaanka, ama LORI, si uu wax uga qabto nusqaamahan jira. LORI waa qalab barnaamij ku salaysan, oo

**DANWADAAG IN BRIEF**


**Duration:** 2018-2022

**Coverage:** Mogadishu in Banadir Region; Baidoa & Afgooye in South West State, and Kismayo in Jubaland State

**Target population:** Displacement Affected Communities (Internally displaced persons, returnees and host communities)

Partners: IOM (lead agency), NRC, Concern Worldwide, Regional Durable Solutions Secreteriat, Shabelle Community Development Organisation (SHACDO), Juba Foundation, Gargaar Relief Development Organisation (GREDO)

**AREAS OF INTERVENTION**



xaaladda la waafajiyey oo lagu cabbiro xaaladda dhexgelinta shakhsiyaadka gudaha ku barakacay (IDPs) iyo qaxootiga bulshooyinka martigelinaya halkaas oo ay soo degeen ka-dib barakacooda. Qalabka LORI ayaa wax lagu qiimeeyaa iyada oo la adeegsanayo sahamada reeraha wuxuna dhibcaha ku muujinayaa hal jaantus; waxa sidaas oo kale lagu kala saari karaa cunsurro kala duwan, sida heerarka guryeynta, biyo helidda, ama degaan ahaan. Arrintan ayaa gacan ka geysanaysa la-socoshada horumarka iyo weliba sidii loola jaanqaadi lahaa barnaamijyada iyo in khayraadka mudnaan loo siiyo sida ay u kala horreeyaan. Qalabka LORI ayaa lagu saleeyay qalab ay UNHCR u diyaarisay dalka Ecuador si loo cabbirro heerarka dib-u-dhexgelinta degaanka ee qaxootiga magaalooyinka.



Dukaanley reer  Kismaayo ah, Maarso 2019. Sawir qaade: Rikka Tupaz / IOM

## Samaynta tusmada dib-u-dhexgelinta degaanka

Dib-u-dhexgelinta bulshada waa ra'yi aan macne sugan lahayn oo ku xiran aragtida qofka ee dhexgelinta bulshada[1]. Danwadaag ayaa tallaabo koowaad ahaan u qaaday fekerka dib-u-dhexgelinta bulshada, oo ku habboon xaaladda dadka gudaha ku barakacay ee Soomaaliya iyada oo wada tashiyo la yeelatay bulshooyinka uu barakacu saameeyay (DACs) iyo daneeyeyaasha kale. Dib-u-dhexgelinta bulshada ayaa lagu qeexay:

"Ku noolaanshaha meel nabad ah oo uu qofku si xor ah ugu dhex socon karo isaga oo bedqaba; iyada oo bulshada lala yeelan karo xiriirro is-aaminaad ku salaysan, la iska kaashan karo wax-ka-qabashada caqabadaha iyo xallinta arrimaha; qofka si buuxda loo aqbalo marka uu ka qaybgalayo hawlaha bulshada iyo go'aan qaadashada bulshada; qofku adeegsan karo xuquuqahiisa iyada oo aan lahayn takoor ku salaysan xaaladda barakaca qofka; iyo iyada oo la heli karo shaqo caddaalad ku dheehan oo xalaal ah, fursado dhaqaale iyo khayraad, oo ay ugu horreeyaan biyo, dhul, cunto caafimaadqab leh, waxbarasho, iyo guryeyn, iyo waxyaabo kale, xitaa marka khayraadku yar yahay ."

Tallaabo labaad ahaan, ayaa Danwadaag waxa ay u sameysay su'aallo qoraal ah oo ka hadlaya shuruudaha isku jirka ah ee dib-u-dhexgelinta bulshada oo ku salaysan ReDSS iyo qaabka guud ee IASC. Shuruudahan ayaa waxa la waafajiyay xaaladda Soomaaliya waxana lagu daray su'aallo dheeraad ah oo ku saabsan wadajirka bulshada ka-dib markii wadatashiyo ballaaran lala yeeshay bulshooyinka uu barakacu saameeyay (DACs). Su'aalahan qoraalka ah ayaa loo adeegsaday in lagu sahamiyo naamuunad dhan 3,028 oo reer oo uu barakacu saameeyay oo la beegsaday. Wareysiyada ayaa u dhacay shakhsi ahaan iyada oo xogta lagu diiwaangelinayey telefoonada gacanta waxayna ka dhaceen degaamada uu ka hawlgallo barnaamijka Danwadaag, ee magaalooyinka Baydhabo, Kismaayo, Afgooye, iyo Muqdisho. Xogta la helay ayaa ka-dib loo adeegsaday in lagu sameeyo qaab lagu go'aaminayo dhibcaha LORI. Danwadaag ayaa arrintan u raadisey xiriirro (xiriirro wanaagsan) oo ka dhaxeeya jawaabaha ay bixiyeen ka-jawaabayaasha iyo heerkooda garashada dib-u-dhexgelinta bulshada iyo arrimaha kale. Tani ayaa loogu talagalay in lagu go'aamiyo arrimaha saameeya sida uu qofku u arko dib-u-dhexgelintiisa bulshada. Tusaale ahaan, reeraha soo sheegay in ay haystaan hoy tayadiisu sarrayso ayaan aad u badnayn in ay ku qiimeeyaan heerka dib-u-dhexgelintooda bulshada mid sarreeya. Iyada oo lagu salaynayo xiriirradan ka dhaxeeya, arrimo badan (doorsoomayaal ah) oo saamaynaya garashada dib-u-dhexgelinta bulshada ayaa la doortay oo la tijaabiyay. Aakhirkii, toddobo arrimood (doorsoomayaal ah) ayaa loo arkay in ay muhiim u ahaayeen dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka: Waxbarasho, cunto, musqullo, heerarka guryeynta, dhul, awood lagu daboolayo

18. La dhexgeliyay xaaladda shakhsiyaadka gudaha ku barakacay (IDPs) oo dib loo dhexgeliyay xaaladda kuwa soo guryo-noqdey.

baahiyadan aasaasiga ah, iyo shaqo. Arrimahan ayaa waxa ka-dib loo sameeyay qiimayn si loo abuuro nidaamka dhibcaha tusmada.

## Waxyaabihii ugu weynaa ee lagu soo ogaaday halka waxa laga soo bilaabay

dadka uu barakacu saameeyay oo badankooda ka soo dhex qaxay gudaha degaamada dawlad-goleedkooda.[2] Boqolkiiba afartan ayaa uga soo tagey meelihii ay asal ahaan ka soo jeedeen abaaro ama fatahaad daraadood in ka badan saddex-meelood meel ayaa uga soo tagey sababo la xiriiro amni-darro iyo colaad. Boqolkiiba toddobaatan ayaa barakacay in ka badan hal jeer ka hor inta aanay iman goobta ay hadda joogaan oo waxa ay goobta ku doorteen colaad la'aan awgeed (38%), gargaar cunto awgiisa (25%), iyo fursado shaqo awgood (15%). Waxa la yaab leh in dad badani ay ku qiimeeyaan heerka dib-u-dhexgelintooda bulshada in uu yahay mid wanaagsan ama heer sare ah (38%), taas oo lagu sababayn karo xaqiiqda ah in ay isbarbardhigaan xaaladooda hadda iyo tan meesha ay ka soo tageen oo sabab u ah aafo dabiici ah ama amni-darro. In kasta oo inta badan reeraha badankoodu ay heli karaan biyo, haddana ku dhowaad 40% ma buuxiyaan baahiyadooda aasaasiga ah ee isticmaalka biyaha, in ka badan kala-bar ayaan buuxin qaddarka ugu badan ee qofkiiba heerka musqulaha.[3] Waxa xiiso leh, dadku in ay u muuqdaan oo keliya in ay biyo la wadaagaan dadka kale ee xaaladda barakacoodu uu la midka yahay tooda. Badankoodu ma laha heshiis kiro rasmi ah, ku dhowaad 50% waxa ay ku nool yihiin hoy cooshado ka dhisan waxana aad iyo aad u kala duwan tayada iyo nooca hoyga ay ku nool yihiin. Reeraha badankoodu waxa ay keliya dakhli ka helaan hal il, caadi ahaan waa shaqaale xoogsato ah, saddexda jeer maalintii cuntada la cuno wax ma wada cunaan, waxa ay qaataan deyman aan rasmi ahayn, waana kuwo aan wax qorin waxna akhrin. In ka yar kala bar carruurta da'da dugsiga ku jirta ayaa dugsiyada dhigta iyada oo ay sabab u tahay khayraad la'aan.

Arrimaha muhiimka u ah dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka ee sida tooska ah u saameeya dhibcaha dib-u-dhexgelinta bulshada:

1. U dhowaanshaha suuqyada cuntada ee degaanka
2. In si ammaan ah lagu gaari karo musqulaha
3. Hoy dad ku filan oo tayo wanaagsan
4. Heshiisyo kiro qoraal ah ama sabarloogada dhulka la deggan yahay
5. Dugsi dhigashada carruurta
6. Awoodda lagu daboolayo baahiyada aasaasiga ah.

## Cawaaqibka barnaamijyada

Natiijooyinka ka soo baxa LORI ayaa durba raadad ku reebay barnaamijyada Danwadaag. Tusaale ahaan, ka-dib markii uu aqoonsaday raadadka sugnaanta dhul lahaanshaha uu ku reebay dib-u-dhexgelinta bulshada, Danwadaag ayaa hadda waxa ay in badan diiradda saaraysaa hawlaha guryeynta, dhulka iyo hantida, iyada oo habkiisa guryeynta ee guud ahaan la-hawlgalayaashiisa iskaashiga ka dhigaya mid jaango'an waxayna bixinaysaa adeegyo badan oo la-talin ah oo ku saabsan arrimaha la xiriira xuquuqda dhulka. Waxa ay sidaas oo kale si dhow isugu duweysaa maamulada dawladda ee degaanka si looga hortagga hoy ka-saaridda waxayna dawladda ka taageerayaa kartida dhinaca dokumentiyada dhulka ee rasmiga ah.

## Cabbiridda dib-u-dhexgelinta bulshada ee mustaqbalka

Qalabka LORI ayaa caddeeyay in uu yahay qalab wax-ku-ool u ah Danwadaag si loo cabbiro dib-u-dhexgelinta bulshada degaan ee degaamada la beegsaday, iyo in barnaamijyada si habboon loo waafajiyo xaaladaha. Qalabka LORI ka sokow, Danwanaag ayaa soo saartay qayb kooban qalabka o noocan ah, Xisaabisada LORI, si loo soo saaro dhibcaha dib-u-dhexgelinta bulshada oo ku salaysan dhowr su'aalood oo muhiim ah. Horumarinta iyo tijaabinta labada qalabka ayaa keliya ah tallaabooyinkii ugu horreey ee loo qaaday dhanka hab adag oo lagu cabbirayo dib-u-dhexgelinta bulshada, oo la socda talooyin lagu horumarinayo. Si kastaba ha ahaate, waxa uu durba qayb muhiim ah ka qaatay doodaha ku saabsan sida ay suuragal u tahay in la cabbiro horumarka laga gaaray Xalalka Waara.

---

2. Marka laga reebo Maamulka Gobolka Benaadir.
3. Labaatan qof musqul kasta iyo 15 litir qof kasta maalin kasta (Jaangoojooyinka Sphere).

EIDACS

Enhancing Intergration of Displacement Affected Communities in Somalia

## Guudmarka Mashruuca

Somaaliya ayaa weli ah meesha ay ka jiraan dhibaatooyinka barakaca ee ugu badan caalamka. Waxa dalka ku nool **2.6 Milyan oo Shakhsiyaad Gudaha Ku Barakacay ah (IDPs)**, kuwaas oo marka la eego in ka badan 180,000 qof ay gudaha ku barakaceen nuskii hore ee sannadkii 2019.

EIDACS waa Dalladda EUTF ee hoos tagta Barnaamijka **RE-INTEG**, iyada oo ujeeddadu ahayd in ay gacan ka geysato abuurista jawi ku habboon **bulshooyinka uu barakacu saameeyay** (DACs) ee ku nool Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya si loo gaaro **xalal waara**.

EIDACS waxa laga hirgeliyay 3 **Goobood oo Kobcin ah**, kudladaha goobaha barakacayaasha halista ku sugan ee magaalooyinka **Baydhabo** iyo **Afgooye**, si loo raadiyo loona tijaabiyo xalal caqligal ah si loogu fekero dadaalladao baaxad- ballaaran oo lagu badinayo. Barnaamijka waxa ka qaybqaata dhammaan kuwa halkaasi ku nool – barakacayaasha iyo kuwa aan barakacayaasha ahaynba.

Tan iyo markii la bilaabay EIDACS bishii Maarso 2017, in ka badan **149,000** qof ayaa ka faa’iidey Heshiisyada Ka Dhaxeeya Beelaha iyo Dib-u-soo-celinta Guryeynta, Dhulka iyo Hantida; waxayna sii wanaajisay heerka noloshooda iyagga oo helaya adeegyada aasaasiga ah; waxayna sii kordhisay helidooda Maciishado macquul ah. Marka la eego 67% waa **haween** 71% waa **shakhsiyaadka gudaha ku soo barakacay**.

## Najiijooyinkii lagu guuleystey in la gaaro intii u dhaxeysay 2017 iyo 2020:

COMMUNITY ENGAGEMENT

- Fududeynta geedi-socodyada Madasha Bulshada uu Barakacu Saameeyay
- Qorshe-hawleedyo ay diyaarisay bulshada iyo aqoonsashada mudnaanaha ee ka-faa’iideystayaasha

HOUSE

- In ka badan 7,000 oo sabarloogo ayaa haweenka loo qaybiyay
- Mucaahaddadii Ugu Horeysay ee Gobolka ee Guryeynta, Dhulka iyo Hantida (HLP)
- Khariidadeynta Halista Hoy Ka-saaridda
- Bixinta adeegyo sharci
- Tababarrada Xallinta Khilaafaadka Guryeynta, Dhulka iyo Hantida

LIVELIHOOD

- 200 oo qof ayaa ka faa’iidey Qaabka-L2E ee Kasbashada Lagu Barto
- 200 oo qof ayaa magaalada Baydhabo lagu siiyay deeqo ay ganacsi abuur ah
- 15 kooxood ahaa loo tababaray VSLA: 200 qof
- 200 oo xubnood oo ka tirsan Kooxaha Is-caawiya ee magaalada Afgooye
- 300 oo qof ayaa loo tababaray xirfadaha maaraynta ganacsiga
- 250 oo qof ayaa loo tababaray abuurista Shirkadaha Yar-yar iyo Kuwa Dhexdhexaadka ah
- 236 oo qof ayaa magaalada Baydhabo loogu tababaray siyaabo beer-falasho hal-abuur leh
- 6 Dugsi oo Dugsiyada Beeraleyda ah ayaa laga dhisay magaalada Afgooye oo ay dhigtaan 150 qof oo beeraley ah

- 3 dugsiyo joogto ah ayaa la dhisay oo ay dhigtaan 2,636 arday

# Habka Xalalka Waara

EIDACS ayaa raacda Qaabka Guud ee Xalalka Waara (IASC), Shuruudo, Tilmaamayaal iyo Mabaadii'da Aasaasiga ee Ugu Weyn ReDSS. Intii u dhexeysey sannadaha 2017 iyo 2019 **dhibcaha dib-u-dhexgelinta bulshada** ayaa la adeegsaday si loo cabbiro dib-u-dhexgelinta bulshada ee Bulshooyinka uu Barakacu saameeyay, oo lahaa isbeddelladan soo socda: 5.25 (2017); 5.75 (2018); 6.32 (2019); iyo 7.11 in 2020. Dhibcaha dib-u-dhexgelinta bulshada waxa ka mid ah tilmaamayaasha ku saabsan bulshada iyo ka tirsanaanta bulshada, dareenka lahaanshaha bulsho sida isha laga helo raaxo.




EDUCATION

- 170 macalimiin ayaa la tababarey, 103 macalimiin ayaa helay lacago dhiirrigelin ah
- Abuurista Guddiyada Waxbarashada ee Bulshada iyo tababaridda xubnahooda
- Agab waxbarasho ayaa loo qaybiyay 2,636 arday
- Soo soo saaridda Qiimeynta Akhriska ee Fasalka Koowaad (EGRA) iyo Qiimeynta Xisaabta ee Fasalka Koowaad (EGMA)

HEALTH

- Laba xarumood oo Xarumaha Caafimaadka Dhallaanka iyo Hooyada ah ayaa la dhisay, iyo hawlo gaarid aan joogto ahayn
- 29,332 oo qof ayaa la gaaray. 3,317 oo qof ayaa xarumo kala loo gudbiyay
- 9,425 oo carruur da'doodu ay ka yar tahay 5 ayaa nafaqo-xumo laga baarey

WATER, SANITATION AND HYGIENE

- Qodista 2 ceel-riig iyo dhismaha 2 barkadood iyo 6 goobood oo biyaha laga dhaansado
- Waxaa la sii wanaajiyay helitaanka biyo nadiif ah oo ay heleen 6,000 oo qoys
- Dayactirka 4 ceel-gacameed
- Dhismaha tuubooyin biyaha qaada (10km)
- 75 xubnood oo ka tirsan Guddiyada Biyaha ayaa la tababaray
- 12,480 oo qof ayaa ka qaybgalay waxqabadyo lagu dhiirrigelinayo nadaafadda
- Xirmooyinka nadaafadda ayaa loo qaybiyay 2,100 oo qoys

CASH TRANSFER

- Lacago caddaan ah oo shuruud la'aan ah ayaa loo qaybiyey ilaa 500 ka-faa'iideystayaal ku sugan Afgooye

# Ka-qaybgalka Bulshada iyada oo loo marayo Madasha Bulshadu uu Barakacu Sameeyay (DAC) ee Iskaashiga EIDACS

Waxa qortay Stefanie Barratt



Dood kooxeed arrimo gaar ah oo ay isla-falanqaynayso Madasha Bulshada uu Barakacu Saameeyey intii ay socotay Daraasad Xaaladeed uu sameeyay Samuel Hall, Baydhabo, 2019

Dadaalka EIDACS ee uu maalgeliyo Sanduuqa Amaanada Xaaladaha Degdegga ah ee Midowga Yurub ee Afrika, ayaa loogu talagalay in uu bixiyo taageero lagu kobcinayo dib-u-dhexgelinta waarta ee bulshada ee kuwo soo-guryo-noqdey iyo shakhsiyaadka gudaha ku barakacay (IDPs) ee Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya.

Iyaga oo aqoonsan in ka-qaybgalka bulshada ay muhiim u tahay Xalalka Waara, ayaa la-hawlgalayaashu waxa ay bilaabeen in ay ku tijaabiyaan nooc dhismayaasha bulshada oo hal-abuur leh labo "goobood oo lagu kobciyo" kuna yaalla magaalada Baydhabo. "Madasha DAC[1]" oo ka wakiil ah bulshada uu barakacu saameeyey ayaa laga hirgeliyay goob kasta si ay ugu adeegto hab hay'adeed oo lagu qaabaynayo adeegyada jira iyo kuwa mustaqbalka. Iyada oo lagu salaynayo waraysiyo tayo-sheeg ah, daraasad xaaladeedan ayaa waxa ay dhigaysaa qaabka madasha DAC iyo habka shaqada, saamayntooda ay ku reebeen bulshada, wada-shaqaynta ay la leeyihiin la-hawlgalayaasha hirgelinaya iyo joogteynta la filayo ka dib marka uu dhammaado EIDACS.

## A) Sidee loo soo xulay xubnaha ka mid noqonaya madasha DAC?

Goobaha kobcinta ee magaalada Baydhabo waxa ay ka kooban yihiin kudladda degsiimooyin iyo xaafado ay deggan yihiin dadka gudaha ku barakacay (IDPs), kuwa soo guryo-noqdey iyo bulshada martigelinaysa. Kooxahan caadi ahaan hal cod kuma wada hadli jirin ka hor inta aan la abuurin madasha DAC:

1. Bulshada uu barakaca saameeyay

“ **Markii hore, waxa jirey wakiillo matalayey bulshada. Laakin si wadajir ah uma wada shaqayn jirin. (…) Hoggaamiyeyaasha kaamka ayaa waxa ay ku tartami jireen habka soo xulista ka-faa'iideystayaasha. Ururradu waxa ay u baahnaayeen meel ay u maraan, waana madasha DAC.”**
Xog-bixiye muhiim ah, madasha DAC

Hannaanka khariidadaynta daneeyaha ayaa bixiyey hagid ku saabsan sida loo dhisayo madasha DAC ee laga hirgelinayo goob kobcin kasta. Xubnaha madasha DAC ayaa lagu magacaabay si ku salaysan waayo-aragnimo hore iyo hogaamintii ay hore u muujiyeen.

Xubnaha madasha DAC kasta ayaa waxa ay ka kooban yihiin sagaal xubnod, waxana ka mid ah wakiillo ka socda xaafadda dadka gudaha ku barakacay, wakiillo ka socda kuwa soo guryo-noqdey iyo bulshada martigelinaysa, wakiilka dhallinyarada, xubno matalaya haweenka iyo culumaa'udiinka. Caadi ahaan, qaybahani waa kuwo isku dhex jira. Qaybintan ayaa waxa ka dhashay su'aallo ku saabsan metelaadda caddaaladda ah ee kooxaha oo dhan, iyada oo bulshooyinka martigelinaya iyo haweenkaba ay dareemayaan in aan si fiican loogu metalin. Metalaadan aan isku dheelitirnayn ayaan si kastaba ha ataatee u muuqan mid caqabad ku ah go'aan qaadashada, iyada oo xog-bixiyeyaashu ay xaqiijiyeen in uu yaraa khilaafka ka jira kooxda gudaheeda.

“ **Xubnaha madasha DAC isma khilaafaan – [waxa aan] raacnaa xeer-dhaqameedka Soomaaliyeed ee xallinta khilaafaadka.”**
Xog-bixiye muhiim ah, DRC

Madasha DAC ayaa shirar joogto ah ku qabata hoolka bulshada. Qoraallo ayaa shirarka caadiga ah laga diyaariyaa, balse kuwa arrimaha gaarka ah loo qabto wax qoraallo ah lagama diyaariyo. Ma jiro hab rasmi ah oo looga warbixinayo.

## B ) Waa maxay hawlaha ay qabtaan madasha DAC?

Madasha ayaa waxa loogu talagalay in ay noqdaan isku-xirayaasha u dhaxeeya bulshooyinka (kuwa gudaha ku barakacay, kuwa martigelinaya, kuwo soo guryo-noqdey) iyo kuwa bixinaya adeegyada sida ururrada gargaarka bixiya, iyo sidaas oo kale (ilaa xad yar) qaybaha dawladda.

- ### Iskaashiga ay la yeeyihiin bulshooyinka

Madasha DAC ayaa u muuqata in ay tahay mid si fiican loo yaqaan oo ay bulshadu qaddariso – marka aad guddoomiyaha xerada dhexdeeda socod kula marto ayaa waxa aad arkaysaa isaga oo jiiro kasta lagu salaamayo. Iskaashiga ay bulshooyinku la leeyihiin, ayaa madasha DAC waxa ay ugu adeegaan sida kanaal laba dhinacle ah: gaarsiinaya macluumaadka ku saabsan baahiyada iyo arrimaha mudnaanta koowaad u leh dhinaca NGO-yada / daneeyayaasha dawladda ah, taa beddelkeedana waxa ay dib ugu soo gudbiyaan qorshayaasha iyo mudnaanaha koowaad ee barnaamijyada kuwo ugu dambayntii loo naqshadeeyey si ay uga faa'iidaan.

In kasta oo ay jiraan guddiyo kale oo u adeegga isla ujeeddadaasi, kuwaas waa kuwo midkoodba si gaar ah u metalo hal koox-hoosaad (tusaale ahaan ururrada iskaashiga dadka gudaha ku barakacay) ama diiradda saaraya hal mowduuc ama waax. Madasha DAC ayaa sidaas darteed u adeegaysa sidii hay'adda ugu horreysay ee hawsheedu tahay in ay u hadasho bulshada iyada oo aan loo eegayn xaaladda barakaca iyo dhammaan mowduucyada ku saabsan taageerada la bixiyay.

Hawsha ugu weyn ee ay qabtaan madasha DAC sida ay fahamsan yihiin bulshooyinka waa in ay wargeliyaan barnaamijyada iyaga oo bixinaya talooyin ku saabsan shuruudaha lagu soo xulayo ka-faa'iideystayaasha. Isla mar ahaantaana, qayb muhiim ah oo ka mid ah hawlaha madasha DAC waa in ay bulshooyinka u gudbiyaan macluumaad ku saabsan barnaamijyada iyo diiwaangelinta ka-faa'iideystayaasha. Macluumaadkan ayaa la wadaagaa iyada oo loo sii gudbinayo guddi-hoosaadyo ama iyada oo loo qabanayo kulamo u gaar ah.

“ **Waxa aan wadaagnaa macluumaadka, tusaale ahaan marka ka-faa'iideystayaasha gargaarka cuntada ama kaashka la soo xulayo, waxa aan kala tashannaa hoggaamiyeyaasha laamaha iyo odayaasha xaafadda. Waxa aan diiwaangelinaa ka-faa'iideystayaasha iyada oo lagu salaynayo nuglaantooda.”**
Xubin ka tirsan madasha DAC

- **Iskaashiga ay la yeeyihiin la-hawlgalayaasha fulinta**

  Macaamilka ka dhaxeeya la-hawlgalayaasha fulinta iyo xubnaha madasha DAC ayaa kala duwan wuxuna ku salaysan yahay mas'uuliyadahooda gaarka ah. DRC waa la-hawlgalaha fulinta leh mas'uuliyadda guud ee lagu dhisay madasha DAC, waana la-hawlgalaha xiriirka ugu badan la yeesha. La-hawlgalayaasha kale waxa ay in badan la macaamilaan madal-hoosaadyada loo abuuray faragelimahooda gaarka ah – guddiyada laf ahaantooda la dhisay iyaga oo ay taageerayaan xubnaha madasha DCA. Saamaynta madasha DAC ayaa sidaas darted raad lagu yeeshay iyada oo loo marayo hal heer oo kala-saarid ah.

  Sida lagu doodi karo adeegga ugu muhiimsan ee ay qabtaan madasha DAC iyo guddi-hoosaadyada ee la-hawlgalayaasha fulinta ayaa ah soo xulista ka-faa'iideystayaasha. Saamaynta ay halkan ku leeyihiin waa mid la taaban karo, waana sababta ugu muhiimsan ee ay taageero iyo kalsooni uga haystaan bulshooyinka:

  > **" Waxa maalin telefoonka iga soo wacay madasha DAC. Waxa ay igu dhaheen: madasha DAC ayaa waxa ay ku siin doontaa miraha abuurka khudaarta. Waxba kama ogeyn fursadan, balse xubin ka tirsan madasha DAC ayaa ogaa in aan ahay qof nugul."**
  > Haweenay ka mid ah xubnaha bulshada

  Marka la eego sinnaanta helidda gargaarka ayaa waxa ku mahadsan madasha DAC, waxa hadda jira cadaadis saaran dhammaan ururrada waxqabadyada ka hirgelinaya magaalada Baydhabo in ay raacaan habka la tashiga bulshada oo la mid ah midka EIDACS.

- **Iskaashiga ay la yeeyihiin la-hawlgalayaasha dawladda iyo guddiyada qaran la xiriira**

  Madasha DAC ayaa sidaas oo kale loogu talagalay in ay wada-shaqayn dawladda iyo guddiyada qaran la yeeshaan oo diiradda lagu saarayo arrimaha barakaca. Ilaa iyo heerka ay wada-shaqayntani gaarayso ayaa ay  ku kala duwan yihiin waaxaha iyo heerarka dawladda. Madasha DAC ayaa xiriir la leh maamulada heerka degmo waxa ay maamulada degaanka kala shaqeeyaan arrimaha ku saabsan qoondaynta dhulka, xallinta khilaafaadka iyo isuduwidda waxqabadyada bani'aadamnimada. Mowduuca inta ugu badan laga wada hadlo ayaa u janjeera in uu yahay heshiisyada dhulka iyo sabarloogada, oo waafaqsan hawlaha ay wado hay'adda NRC. Dhanka kale, madasha DAC weli xiriir badan lama yeelan waaxaha kale ee dawladda sida Wasaaradaha Biyaha iyo Qorsheynta.

## C) Maxaa xiga?

Marka la eego xubnaha madasha DAC oo aan wax lacag ah qaadan oo hadda ku shaqeeya kaabayaal dhaqaale la'aan, caqabadaha hawlgalkooda joogtada ah soo wajaha ayaa si barbardhig ahaan hoosaysa.

> **" Haa, xitaa haddii ay EIDACS dhammaato waxa aan weli si iskaa-wax-u-qabso ah ugu shaqayn doonaa bulshadeena, sababta oo ah waa nala aaminey waxana dadka oo dhan la leenahay xiriir wanaagsan."**
> Xubin ka tirsan madasha DAC

Si kastaba ha ahaate, ka sokow in ay yihiin wakiillada bulshada ee aan sharciga ahayn, xubnaha madasha DAC ee hadda ayaa horey ugu xirnaa barnaamijyada kale ee Xalalka Waara oo ay ka mid yihiin Barnaamijka Xalalka Waara (DSP) iyo Danwadaag (oo ay hogaamiso hay'adda IOM). Kan dambe ayaa si toos ah loogu dhisi doonaa waayo-aragnimada madasha DAC iyada oo la waafajinayo EIDACS, lana abuurayo qayb weyn oo la mid ah (30 xubnood ka kooban) si loo kordhiyo u dhammaanshaha iyada oo sidaas oo kale xubnaha madasha DAC laga qaybgelinayo qaab-dhismeedka cusub. Xubnaha madasha DAC waxa ay ku lug lahaayeen xulashada kuwa cusub. Caqabada mustaqbalka hor taalla ayaa noqon doonta xaqiijinta in madasha DAC ay la shaqeeyaan dhammaan la-hawlgalayaasha hirgelinta ee ka hawlgalla goobahooda kala duwan.

# Awood-siinta dhaqaale ee haweenka iyada oo loo marayo kaalmo maaaliyadeed dheeraad ah oo la siiyo Kooxo Is-caawiya

**Waxa qortay Courtenay Cabot Venton inclusion**

Kooxaha Is-caawiya (SHGs) ayaa Soomaaliya ka noqday hab dhaqaale iyo mid bulsho si loo dhiso bulshooyin adkaysi leh oo gacan ka geysta Xalalka Waara. Waa kuwo bulshada ku salaysan oo la joogteyn karo, waxa ay taagan yihiin boos wanaagsan oo ay kula shaqeeyaan kuwa ugu nugul si ay wax uga qabtaan natiijooyinka saboolnimada. Nidaamka Kooxaha Is-caawiya (SHGs) ee ka jira Soomaaliya/Somaliland ayaa waxa ka mid ah 30 urur in ka badan oo ka shaqeeya goobtan iyada oo loo marayo ururro badan iyo shabakado waaweyn oo kuwa hirgelinta.  Suuragal ma aha in la diiwaangeliyo tirada guud ee kooxaha, maadaama ay dhici karto in tiro mug leh laba jeer la tiriyo. Si kastaba ah ahaate, waxa la qiyaasayaa in guud ahaan dalka ay ka jiraan 3,000 oo kooxood oo ka tirsan 57,000 oo xubnood[1]. Taageeridda Kooxaha Is-caawiya (SHGs) ayaa noqotay qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqada hay'adda Concern Worldwide (Concern) ee Soomaaliya iyo Somaliland. Arrintani ayaa la hirgeliyaa iyada oo la hoostegayo barnaamijyo dhawr ah oo kala duwan iyo Iskaashiga NGO-yada.

Iyaga oo hoos imaanaya barnaamijka BRCiS-DFID programme[2], Concern iyo The Share Trust ayaa waxa ay wada-tashi la sameeyeen daneeyayaasha bishii Oktobar 2018, iyaga oo isu keenay 30 urur oo la shaqeeya Kooxaha Is-caawiya (SHGs) ee Soomaaliya. Dhisidda nidaam la joogteyn karo si Kooxaha Is-caawiya (SHGs) ay u kobcaan ayaa ahaa mid ka mid ah waxyaabaha mudnaanta la siinayo ee la aqoonsaday, ee u baahan helidda sii wanaagsanaatay ee adeegyada aasaasiga ah iyo xiriirrada lala leeyahay hay'adaha ka shaqeeya maalgelinta yar-yar (MFIs). Warbixinta Wada-tashiga[3] ayaa aqoonsatay in ay mudnaan muhiim ah tahay baahida loo qabo feker nidaamsan oo ku saabsan xiriirada lala leeyahay hay'adaha ka shaqeeya maalgelinta yar-yar (MFIs) iyo badeecooyinka maaliyadeed ee dadka saboolka u roon si loo taageero koboca la joogteyn karo ee kooxda iyo horumarinta hawlaha ganacsi.

Intii lagu guda jiray 2020, iyada oo taageero laga helayo BRCiS, The Share Trust iyo Iskaashiyada Xalalka Waara (SDCS, EIDCAS iyo Danwadaag), ayaa daraasad sameeyey iyada oo ujeeddada laga lahaa ay ahayd in si taabogal ah loogu sheego mashruuca iyo in loo doodo istiraatiijiyadaha si saamayn leh loogu xoojinayo si loo ballaariyo nidaamka Kooxaha Is-Caawiya (SHG) ee Soomaaliya. Shaqadan ayaa ka fekeraysa helitaanka iyo noocyada bedeecooyinka maaliyadeed ee dadka saboolka u roon, iyo sidaas oo kale caqabadaha xubnaha Kooxaha Is-Caawiya ka hortaagan in ay Soomaaliya ku helaan.

1. Kooxaha Is-caawiya iyo Adkeysiga ee Soomaaliya: Taageeridda iyo Xoojinta Nidaamka SHG. Warbixin Wadatashi ee ay Courtney Cabot Venton u qortaya hay'adda Concern Worldwide Somalia, bishii Jan 2019.
2. BRCiS: Dhisidda Bulshooyinka Soomaaliyeed oo Adkeysi leh, dallad bani'aadamnimo oo ay sannadkii 2013 ay aasaaseen shan NGO-yo caalami ah oo waayo aragnimo dheer u leh Soomaaliya – Cooperazione e Sviluppo (CESVI), Concern Worldwide, the Norwegian Refugee Council (NRC), the International Rescue Committee (IRC), iyo Save the Children International (SCI) – iyada oo ujeeddada laga lahaa ay ahayd in ay wax ka qabato wajahida ay mudda-dheer ay Bulshooyinka Soomaaliyeed wajahaan aafooyin iyo macluusha soo noqnoqda.
3. Kooxaha Is-caawiya iyo Adkeysiga ee Soomaaliya: Taageeridda iyo Xoojinta Nidaamka SHG. Warbixin Wadatashi ee ay Courtney Cabot Venton u qortaya hay'adda Concern Worldwide Somalia, bishii Jan 2019.





Xaliima waa xubin ka tirsan mid ka mid ah Kooxaha Is-caawiya ee ka jira magaalada Hargeysa. Sawir-qaade: Ayaanle Faarax, Sarkaalka Mashruuc  FIM, Barnaamijka SDSC / Concern Worldwide.

## Waxyaabihii Lagu Ogaadey ee Muhiimka ah

### Khariidadeynta Nidaamka Maaliyadeed

Waxa jira shan qaybood oo waaweyn oo ka mid ah hawlwadeenada maaliyadeed ee qaybta maaliyadda rasmiga ah ee Soomaaliya: bangiyo dhexe, bangiyo ganacsi, ganacsiyada xawaaladaha lacagta (MTB), hay'adaha ka shaqeeya maalgelinta yar-yar (MFI) iyo hawlwadeenada bixiya adeegga lacagaha telefoonka gacanta (MNO). Hay'adaha maaliyadeed ee Soomaaliya waa kuwo aad u da'yar, badankooda waxa la aasaasay tobankii sano ee la soo dhaafay gudahooda kuwo badana dhawrkii sano ee la soo dhaafay. Waxa ay si aad iyo aad ah uga war hayaan in ay Soomaaliya u nugushahay agagaxyo kala duwan – kuwo dhaqaale, cimilo, siyaasadeed iyo colaad. Guud ahaan, arrintan ayaa waxa ka dhashay doorbidda hab amaah bixin aad looga taxadaro oo lacagaha la bixiyo muddo kooban oo keliya: sidaa darteedna la doorbido amaahda lagu maalgeliyo ganacsi ama hanti ma guurto ah, iyada oo heshiisyada si hufan loogu xiro waqti cayiman. Bangiyo badan ayaa amaah ku bixiya qayb yar oo ka mid ah kaydkooda, si ay isaga ilaaliyaan bixin-waaga amaahda ee curyaamin karta hawlgaladooda haddii ay dhacaan argagaxyadu. Badeecooyin caymis la'aan--sida muuqata aanay bangiyada laf ahaantoodu lahayn--ayaa sidaas oo kale kordhiya u nuglaantooda argagaxyada, sidaas darteed waxa ay sii wadaan istiraatiijyado amaah ah oo aad looga taxaddaro.

Jaantuska E1. Xiriirrada Ka Dhaxeeya Hawlwadeenada Maaliyadda, NGO-yada iyo Kooxaha Is-caawiya



Jaantuskan soo socda ayaa waxa uu muujinayaa khariidadaynta hawlwadeenada kala duwan ee uu ka kooban yahay nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya. Khariidadani waa nooca la fududeeyay ee nidaamka oo xaqiiqdii adag oo leh isku-xirnaan ka badan inta halkan lagu muujiyey.

In kasta oo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya aanu lahayn xeer-nidaamiyayaal la xiriira aasaasidda bangiyo cusub, jaangoynta hab-dhaqanka bangiyada iyo xeer-nidaamyada la xiriira maamulka gobollada, sidaas oo ay tahay haddana waxa uu weli haystaa fursad weyn oo uu ku kobco marka la eego awoodda uu u leeyahay in la dhaqangeliyo xeer-nidaamyada jira iyo awoodda uu ku soo saari karo qaabka guud oo sharci oo loogu talagalay laamaha ganacsiyada cusub ama dimograafiga (sida qaabka guud ee sharciyada MFI ama MNO). Arrintan ayaa saamayn ku yeelan karta gebi ahaanba nidaamka noocyada badeecooyinka ee la bixiyo. Tusaale ahaan: bangiyo badan ayaa weli  ku tiirsan qaab-dhismeedka isla-xisaabtanka ee qabiilka ku dhisan; bangiyada ayaa caadi ahaan waxa ay haystaan oo keliya lacago ku filan in ay ku hawlgalaan waxana xaddida kartida iyo awoodda bangiga dhexe; dabciga aan sharciyaysnayn ee nidaamka lacagaha telefoonka gacanta ayaa suuragalinaya in uu yimaado kala-badnaasho u dhaxeeya lacagaha dhabta ah iyo kuwa dijitaalka(rugaha) ah; waxa jirta khatar ah in tallaabooyin khalkhalgelin ama sicir-barar la qaado iyada oo aanu jirin isla-xisaabtan, taas oo suuragal ah in ay keento qalalaase ku yimaada kalsoonida lagu qabo nidaamka maaliyadeed; in aanu jirin dib-u-habayn lagu sameeyo lacagaha ayaa macanaheedu yahay in uu aad u sarreeyo heerarka lacagaha been-abuurka ah ee nidaamka. Lacagaha telefoonka gacanta ayaa kaalin muhiim ah ka qaata nidaamka maaliyadeed ee Soomaaliya, oo inta badan sabab u ah in aan lagu kalsoonayn shillin Soomaaliga, adkaanshaha in macaamiiisha yar-yar loo adeegsido doolarka Maraykanka (USD), iyo kharashka khidmadda adeegga oo eber ah iyo fududaanta  adeegyada lacagta telefoonnada gacanta.

## Khariidadaynta helitaanka badeecooyinka u roon dadka saboolka

Xaaladdan gudaheeda, in la helo badeecooyin u roon dadka saboolka ah sidaas uma badna. Nidaamka ayaa waxa uu si xoog leh u dhiirrigelinayaa tiro yar oo macaamil  qiimahoodu sarreeyo marka loo eego tiro badan oo macaamil qiimahoodu hooseeyo. Fursadaha amaahda la siiyo ganacsiyada yar yar, aan rasmiga ahayn ama xoogaa yar rasmi ah ayaa aad u xaddidan. Iyada oo arrintan laga duulayo, badeecooyinka maaliyadeed ee u roon dadka saboolka ah ee ugu badan ee la heli karo iyada oo loo marayo hawlwadeenada maaliyadeed ayaa ah xisaabo bangi ku wajahan-koox ama amaah iyada oo la raacayo xeer-nimaadyo la waafajiyey oo la jaanqaadaya dadka saboolka ah.

## Helidda Adeegyada Maaliyadeed ee Kooxda Is-caawisa (SHG)

In kasta oo badeecooyin iyo adeegyo maaliyadeed la heli karo, hadana taasi macnaheedu ma aha in xubnaha Kooxda Is-caawisa (SHG) ay helayaan ama xitaa ay ka war hayaan jiritaankooda. Jawaab-celin laga helay gudaha goobta shaqada ayaa muujinaysa in ka-jawaabayaashu ay garanayaan hawlwadeenada maaliyadeed sida Bangiyada Salaam Salaam Bank, Dara Salaam, Dahabshil, IBS iyo Amal Bank, balse in yar oo keliya ayaa dhab ahaan xisaabo bangi oo gaar ah uga furan yihiin. Xaalado badan, gaar haan degaamada miyiga ah, xubno ayaa sheegay NGO-yada sida Concern in ay ahaayeen ilaha maaliyadaha laga heli karo ee ka baxsan kuwa lacagaha amaahda ah bixiya. Iyada oo lagu salaynayo qoraallo qayaxan iyo sahan telefoonka lagu sameeyey, oo loo maray Xarunta Wicitaanka DFID, ayaa waxa ay u muuqataa in xubnaha Kooxda Is-caawisa ay badanaaba adeegsadaan xisaabaha bangiga ee kooxda/gaar ah, haddii ay helayaan adeegyo maaliyadeed, kooxaha ayaa weli adeegsanaya badeecooyin beri dhoweyd la bilaabay sida amaahda  ay aasaasayaan ee la helo iyada oo loo marayo waaxo aan rasmi ahayn.

## Casharrada Laga Bartey – Caqabadaha Hortaagan iyo Guulaha La Xaqiijiyey

Waxa jira dhowr caqabadood oo xubnaha Kooxda Is-caawisa (SHG) ka hortaagan in ay helaan badeecooyin maaliyadeed. Inta badan, haddii aanay ahayn dhammaan, bixiyeyaasha adeegga maaliyadeed aad uma rabaan in ay halis qaataan, sidaa awgeed waxa ay leeyihiin oo u degsan shuruudo adag oo ku xiran u-qalmidda, amaah aan waxba laga bedeli karin, muddo dheeraysi gaaban iyo shuruudo ku waajiba oo amaah-bixiyeyaashu ku doonayaan in qaddar lacageed

oo aad u badan bil kasta la bixiyo. Caqabadaha hortaagan helidda badeecooyinka ayaa waxa ka mid ah: in loo baahan yahay damiin/damaanad-qaad maaliyadeed, bixinta aqoonsi maaliyadeed dal aan lahayn nidaam aqoonsi qaran, bixinta dukumentiyo sida shatiyo ama dukumentiyo diiwaangelin, ka qaybgalka hannaan amaah oo waqtiga dad ka lumiya, iyo amaah-qaatayaasha in looga baahan yahay in ay leeyihiin taariikh amaah si ay u helaan amaah. Intaa waxa dheer, in hay'adaha maaliyadeed ay mudnaanta koowaad siiyaan ganacsatada waaxaha wax-soos-aarka leh tanina waxa ay caqabad ku noqon kartaa kooxaha saboolka ah. Shuruudahan amaahda ayaa ku adag amaah-qaatayaal badan oo sabool ah, gaar ahaan dadka gudaha ku barakacay (IDPs) iyo haweenka. Haweenku ma haystaan khayraadka iyo shabakadaha bulshada ee la midka ah kuwa ay haystaan ragga oo u ogolaanaya in ay buuxiyaan shuruudaha damaanad-qaadka iyo rahanka/curaarka. Waxa ay dhibaato kala kulmaan caadooyinka dhaqdhaaqa xaddida ee jinsiga waxana laga yaabaa in ay cadaadis kala kulmaan nimankooda marka ay raadinayaan in ay helaan amaah oo ay aasaasayaan ganacsiyo cusub.

Dhinaca xubnaha Kooxda Is-caawisa (SHG), caqabadaha ka hortaagan maaliyad helidda ayaa waxa ka mid ah: nusqaamo ka jira xagga aqoonta, marka la eego ka warqabka adeegyada la heli karo iyo sida loo helo karo labadaba; gaaridda juqraafi maadaama meello badan oo miyi ah aanay lahayn bangiyo; akhris-qoris la'aanta iyo hab-fekerka ayaa sidaas oo kale khalkhal gelin kara helidda maalgelinta yar yar; xubnaha Kooxda Is-caawisa ayaa ka walwala heerarka sarreeya ee halisaha ay leeyihiin, oo ah in aanay awoodi doon in ay dib-u-bixiyaan amaahda haddii ay maareeyaan in ay mid helaan, waxa uga sii dara ku tiirsanaanta ay ku tiirsan yihiin waxqabadyo ganacsi ku timaaman dakhli iyo faa'iidooyin yar, iyo; fursado awood dhisid la'aan ayaa adakeeya  xubnaha Kooxda Is-caawisa (SHG) in ay ka gudbaan caqabadaha jira oo ay u gudbaan shaqooyin faa'iido badan laga helo.

Si kastaba, waxa jira hal-abuurro iyo sheekooyinka guusha oo sii kordhaya kuwaas oo wax ka qabanaya caqabadahan isla-markaana yaraynaya halista si ay dadka saboolka ahi u helaan badeecooyinka maaliyadeed. Qaar badan oo ka mid ah hal-abuuradan ayaa ka dhashey iskaashi u dhaxeeya hawl-wadeenada maaliyadeed ee kala duwan, iyada oo NGO-yada, hay'adaha maalgelinta yar yar (MFIs) iyo bangiyada ganacsi ay isugu yimaadeen tijaabinta adeegyo aad u habboon. Waxa jira cadaadis sii kordhaya oo lagu doonayo hal-abuur iyo debecsanaan ku saabsan shuruudaha amaahda lagu qaato, sida cidda magacaabaysa damiinka iyo bixinta aqoonsiga maaliyadeed iyo u-qalmidda amaahda.

Halka Kooxaha Is-caawiya ay awoodaan in ay helaan adeegyo maaliyadeed, cunsurrada guusha ayaa u muuqda in ay ka mid yihiin: heerarka sarreeya ee raasamaalka bulshada oo fududeeya helidda damiinka/damaanad-qaadka; helidda macluumaad ku saabsan adeegyada gaarka ah ee laga heli karo degaankooda; taageero lagu helayo adeegyadaas iyada oo midkood loo marayo qabiilkooda ama urur; tababarka iyo awood  dhisidda habboon si loo hago nidaamka; hab-fekerka wanaagsan oo u ogolaanaya in ay aaminaan awoodda ay ku guulaysanayaan; iyo qaab ganacsi oo hal-abuur leh oo gacan ka geysanaya yaraynta buux-dhaafka suuqa.

## Talooyin

Hal-abuurrada barnaamijka ee taageeri kara in Kooxda Is-caawisa laga qaybgeliyo nidaamka maaliyadeed ayaa waxa ka mid ah:

- in uu kor-u-qaado wacyiga iyo adeegsiga xisaabaha kooxda;
- in uu noqdo damaanad-qaade/damiin;
- in uu yareeyo ama kaabo kharashka lagu soo iibsanayo aqoonsiga iyo diiwaangelinta ganacsiga si loogu dhiirrigeliyo ganacsiyada waaxda aan rasmiga ahayn in ay u wareegaan qaab-dhismeedyo rasmi ah;
- in uu baahiyo hannaanka amaahda iyada oo loo marayo Urur Heer Kudlad ah (kuwan waa ururrada/xiriirrada ay isugu yimaadeed dhawr ka mid ah Kooxaha Is-caawiya);
- in uu diyaariyo dukumentiyada amaahda iyo ganacsiga ee ku habboon macaamiisha akhris-qoraalkoodu hooseeyo;
- in uu maalgeliyo dadaallada lagu muujiyo helidda haweenka;
- in uu maalgeliyo sii wanaajinta kartida Kooxaha Is-caawiya, iyo xoojinta isuduwidooda iyo meelaha ay macluumaadka ku wadaagaan;

- in uu taageero iskaashi ballaaran in laga yeesho nidaamka iyo hubinta tayada ee ku saabsan xirmooyinka tababarka gaarka u ah hawsha;
- in u ballaariyo siyaabaha lagu sii wanaajinayo aqoonsiga maaliyadeed iyo aaminaadda;
- in uu ballaariyo Kooxda Is-caawisa(SHG)/ Ururka Heerka Kudladda ah(CLA) in ay helaan qalab dijitaal ah si loo sii wanaajiyo kartida oo la isugu soo dhoweeyo farqiga ka mid ahaanshaha nidaamka maaliyadda; iyo
- in uu ballaariyo cilmi-baarista iyo kormeerka ku saabsan in la lacagayn karo hantida kooxda.

Istiraatiijiyadaha u-doodidda si saameyn loogu yeesho isbeddelka wanaagsan ee haweenka looga qaybgelinayo nidaamka maaliyadda ayaa waxa ka mid ah:

- in loo doodo in bangiyadu ay ballaariyaan ikhtiyaaradooda damiinada iyo in ay abuuraan daahfurnaan ku saabsan helidooda;
- in kor loo qaado fekerka ay dadku ka haystaan bangiyada buuxinaya shuruudahan si looga caawiyo in ay fidaan;
- in la dhiirrigeliyo oo la baahiyo badeecooyinka amaahda la sii weyddiistey oo dheeri ah ee loogu talagalay ganacsiyada yar yar (gaar ahaan leh xisaabo kooxeed);
- in la abuuro oo loo doodo hagid loogu talagalay in ay bangiyadu abuuraan xisaabo gaar u ah Kooxaha Is-caawiya;
- in lagu dhiirrigeliyo bangiyadu in ay caymis bixiyaan; iyo
- in lagu biiro wadahadallada ku saabsan isbeddelada nidaaminta ee muhiimka ah.



Qoraalka  sawirka jeldiga: Waa xiisad xisaab ah oo ay qaadanayaan 20 haween ah oo ka tirsan Kooxda Is-caawisa ee Degmada Afgooye 2019. Sawir-qaadaha: Maxamed Axmed Abuukar (Naaji), SHACDO.

# Hoy ka-saarid: Waa kan ugu muhiimsan dadaallada Xalalka Waara ee ka socda Soomaaliya

**Waxa qoray Joseph Jackson**

Helitaanka Xalal Waara oo barakaca ah ayaa weli rajo fog ah oo ay qabaan bulshooyin badan oo ku nool guud ahaan Soomaaliya iyada oo ay sabab u ah caqabadaha murugsan, adag ee haysta. Waxa sii dheer argagaxa cimilada iyo amni-darrada ee soo noqnoqda, barakac labaad oo sabab u ah ama ka dhasha barakacayaasha in laga saaro hoyga ay deggan yihiin oo weli wax u dhimma dadaallada soo-kabashada aasaasiga ah. In ka badan boqolkiiba 90 ka mid ah rubuc-milyanka qof ee hoygooda laga saarey sanadkii 2019 ayaa waxa ay dhawr jeer la soo kulmeen hoy ka-saarid intii sanadkaasi lagu guda jirey, taasi oo sababtay in ay lumiyaan ama khasaaraan hanti shakhsiyeed iyo maalgashiyo muhiim u ahaa, oo ah heerar reer iyo kuwo degsiimo. Ka-saaridda heerka-degsiimo ayaa ah kuwo aad u muuqda oo sahlan in dabagal lagu sameeyo marka loo eego dhacdooyinka heerka-reerka, kuwaas oo noqon kara kuwo hoos ka socda, oo aan muuqan. Si kastaba ha ahaatee, cawaaqibka ka dhasha hoy ka-saaridda ayaa si isku mid ah saamayn ugu yeesha dhibbanayaasha, jir ahaan iyo saykoologi ahaanba. Baahsanaanta ififaalaha ayaa sabab u ah in bulshooyin badan oo ka mid ah barakacyaasha ay ka cago-jiidaan in ay ka qaybqaataan dadaallada soo kabashada ee macnaha ku fadhiya. Xaaladaha qaar, shakhsiyaadka gudaha ku barakacay (IDPs) ee aan haysan dhul ay xaq ahaan u leeyihiin ayaa loo diidaa in ay helaan gargaar hoy iyo taageerada maciishada ee nooca beer-falashada ah, xaalado badanna, hoy ka-saaridda ayaa waxa sidaas oo kale ka dhashay burbur soo gaaro hantida arrimaha bani'aadamnimada ee ku dhex taalla gudaha degsiimooyinka barakacayaasha ee magaalada Muqdisho, sida nidaamyada biyaha iyo tas-hiilaadka dugsiyada.

Iyada oo ay sabab u tahay fursad la'anta khayraadka, ayaa barakacayaasha badankoodu waxa ay beddelkii lacagta kirada ku bixiyaan gargaarka bani'aadamnimo ee la siiyo, taas oo si aan



Muuqaalka guud ee kaamka hoyga liita leh, buux-dhaafay ee Iyow kooyow kuna yaalla soonaha Xannaano ee magaalada Baydhabo. Sawir-qaade: Cabdulqaadir Aadan, Sarkaalka Gudaha ee SPL, Maarso 2020.

kamma' ahayn u hurinaysa meertada dhibaatada ay leedahay dhiig-miirashada ay milkiileyaasha dhulka kula kacaan barakacayaasha. Dhaqaalaha ay kirada ka helaan ayaa milkiileyaasha qaarkood ku dhaliya in ay ka ganacsadaan hoy ka-saaridda – hoy ka-saarid si ula-kac ah loogu hanjabo ama loo fuliyo iyada oo ujeeddada laga leeyahayna ay tahay soo-jiidashada dareen bani'aadamnimo iyo/ama kaalmo. Dhaqdhaqaaqan firfircoon ayaa ka waxa ka dhasha su'aallo ku saabsan mabda'a waxqabadka bani'aadanimo – in la taageero dhibbanayaasha hoy ka-saaridda laga ganacsado iyo in kale, iyo sida macquulka ah ee loo kala-sooci karo. Hoy ka-saaridda, khasabka ah ama sida kale loo sameeyo, ayaa waxa ay u muuqataa in ay sii xoogeysato inta lagu guda jiro xilliyada ay jiraan xasilloonida joogtada ah marka loo eego xilliyada ay jiraan xaaladaha deg degga ah. In wax yar ka badan boqolkiiba 87 ee dhammaan kiisaska la diiwaangeliyey 2019 ayaa waxa ay ahaayeen kuwo sabab u ah horumarin ama dhismo ay doonayeen in ay dhulka ku sameeyaan, midkood dawladda ama milkiilayaasha dhulka gaarka loo leeyahay[1]. Isla-mar ahaantaana, lafagurista isbeddellada taariikhiga ah ayaa muujinaysa in dhacdooyinka hoy ka-saaridda ay hoos u dhaceen in ka badan boqolkiiba 59 xilligii abaarta 2017-18, iyo in wax yar ka badan boqolkiiba 10 intii u dhexaysay bilihii Febraayo iyo Maarso 2020 markii cabsida laga qabo cudurka COVID-19 ay dalka ku habsatey.

Hay'adda Norwegian Refugee Council (NRC) ayaa waxa ay leedahay barnaamij diiradda lagu saarayo ka hortagga hoy ka-saaridda iyo in bulshooyinka halista sare ugu jira gacan laga siiyo yaraynta raadadka ay ku yeesheen. Barnaamijka ayaa awood u siinaya shabakada xubno bulshada ka tirsan oo iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya iyo la-hawlgalayaasha ilaalinta in ay si nidaamsan ula socdaan, u diiwaangeliyaan oo ay uga soo warbixiyaan dhacdooyinka hoy ka-saaridda. Lafagurista isbeddellada ayaa si joogto ah loo

1. Waxaa loola jeedaa horumarinta guryaha ama dhismayaasha ganacsiga, beddelkii 'horumarinta' waax ahaan

diyaariyaa oo loo wadaagaa si loogu saleeyo qorshaynta arrimaha bani'aadamnimada iyo u doodidda si loogu dhaliyo adeeg bixiyeyaasha ay khuseyo in ay qaadaan tallaabooyinka wax-ka-qabashada ilaalinta oo gaar ah. Macluumaadka hoy ka-saaridda oo dalka oo dhan ah ayaa hadda laga heli karaa bar internet-ka ah oo ay taabogeliso Microsoft Power BI.

Iyada oo wada-shaqayn iyo iskaashi lala yeelanayo milkiilayaasha dhulka, kooxaha ilaalinta ka shaqeeya, iyo dawladaha hoose ee degmooyinka kala duwan ee guud ahaan dalka, ayaa waxa laga hortagey in dad isugeynta tiradoodu gaarayso 70,500 oo qof ay la kulmaan hoy ka-saarid qasab ah waxana la siiyay taageerada dhul ay xaq u leeyihiin ama waxa loo sameeyay dib-u-dejin dheeraad ah. Natiijooyinka ka hortagga ayaa u dhaxeeya min u doodid in dadka la siiyo ogeysiis ku filan ilaa fududaynta in la helo qabanqaabooyinka degaan kale oo beddel ah, ilaa ka hortagga halisaha hoy ka-saaridda sida dhow u dhici karta iyo sugidda in muddada degganaanshaha loo kordhiyo. Bishii Disiimbar ee 2019, qiimaynta saamaynta uu barnaamijka leeyahay oo tusaale bixinaysa ayaa lagu ogaadey in ku dhowaad boqolkiiba 85 dadaallada ay dawladdu hogaamiso ay ahaayeen kuwo lagu guuleystay. Iyada oo barashadani ku salaynaysa, ayaa hay'adda NRC waxa ay kordhisey ama kor u qaaday habka waxayna tijaabisey barnaamijka kobicinta kartida dawldaha hoose. Tijaabada ayaa waxa ka mid ahaa dhisidda iyo hawlgelinta unug qaabilsan hoy ka-saaridda oo ka hawlgala Maamulka Gobolka Banaadir ee magaalada Muqdisho. In ka badan 2,100 degsiimooyin oo ay deggan yihiin dad gudaha ku barakacay ayaa la qiimeeyay kuwaas



Xubin ka tirsan kooxda ICLA ee hay'adda NRC oo dukumenti sabarloogo dhuleed ah ku wareejinaya qoys soo barakacay oo ku nool degsiimada Alla Qabe. Sabarloogooyinka dhulka, oo ay bixiso Dawladda Hoose ee magaalada Baydhabo oo ay fududaeyso hay'adda NRC, ayaa barakacayaasha u suurageliya in ay helaan dhul dokumenti sugan leh. Intii lagu guda jirey qalalaasaha uu abuuray cudurka COVID-19, ayaa shaqaalaha NRC waxay sameynayeen taxaddar dheeraad ah si looga hortaggo in cudurka uu ku faafo dadka la caawinayo. Sawirka: NRC Somalia.

oo ku yaalla magaalooyinka Muqdisho, Baydhabo, Kismaayo, Boosaaso, iyo Hargeysa iyada oo la adeegsanayo hawlaha khariidadaynta halista hoy ka-saaridda ee saddexdii biloodba mar la sameeyo, waxyaabihii lagu ogaadey qiimayntan ayaa loo adeegsaday in lagu saleeyo- dadaallada hawlgallada ka hortagga ah.

Hoy ka-saariddu waa arrin sharci, sidaas awgeed, dadaallada wax looga qabanayo waa in lagu saleeyaa qaabka guud ee sharciga ku habboon iyo nidaamka maamulka caddaaladda ee shaqeeya. In kasta oo ay arrintani weli tahay caqabad weyn oo ka jirta Soomaaliya, ayaa haddana waxa jira xalal hoy ka-saarid dhawr ah oo degaanka lagu dabaqi karo kuwaas oo macquul ah una baahan ka fiirsasho iyo maalgelin joogto ah.

- Tixgelinta koowaad, tallaabooyin la taaban karo waa in la qaadaa si looga dhigo mid gudaha ah loona hirgeliyo qaybo macquul ah oo ka mid ah Borotokoolka Qaranka ee Guryeynta Ku-meelgaarka, Dhabbetusayaasha Hoy Ka-saaridda ee Qaranka iyo Siyaasadaha Qaranka ee Ku Aaddan Dadka Gudaha Ku Barakacay. Iyada oo qayb ka ah hannaankan, wasaaradaha dawladda ee ay khuseyso iyo dawladaha hoose ee ku habboon waa in ay qaybahaasi dhexgeliyaan qorsheyaashooda hawlgalka ee sannadlaha ah.
- Tixgelinta labaad, iyada oo taageero farsamo iyo mid maaddi ahba laga helayo la-hawlgalayaasha bani'aadamnimada ka shaqeeya, gaar ahaan hay'adda NRC oo loo marayo Kudlad-hoosaadka Guryeynta, Dhulka iyo Hantida (HLP), dhammaan dawladaha hoose ee ku yaalla gudaha degaamada la gaari karo waa in laga taageeraa dhisidda kartiyo loogu talagalay dadaallada wax-ka-qabashada iyo ka hortagga hoy ka-saaridda.
- Tixgelinta saddexaad ahna tan ugu dambaysa waa in dawladda federaalka iyo maamul goboleedyada laga dhaadhiciyo in ay abaabulaan oo ay kala wada-xaajoodaan milkiilayaasha dhulka sidii ay dadka uga cafin lahaayeen kirada ururta inta lagu guda jiro qalalaasaha uu sababay cudurka COVID-19. Haddii lagu guulaysto, dadaalkan ayaa waxa uu u oggolaan doonaa barakacayaasha, oo ah qaybaha dadweynaha ee sida aadka ah ay u saameeyay hoy ka-saaridda, in ay diiradda saaran soo-kabashada COVID-19 ka-dib beddelkii ay xirmooyinka gargaaka u adeegsan lahaayeen in ay ku kabaan kirada. Xaaladda noocan oo kale ah shaki kuma jiro in ay sii jiri doonto muddo dheer, sidaa awgeedna waxa ay wax u dhimmi doontaa awoodaha soo-kabashada ee dadka ugu nugul, halka tallaabooyinka lagu yaraynayaa ay ballan-qaadayaan faa'iidooyin badan oo deg deg ah iyo kuwo muddo-fog ah.

# Xiritaanka EIDACS iyo Waaridda

**Waxa qortay Beatriz Valbuena**

Qorshaynta waaridda barnaamijyada iyo natiijooyinkooda ee xaalahada nugul ayaa caadi ahaan adag, gaar ahaan kuwo ay colaaddu kala qaybisay. Go'aanka barnaamij lagu xirayo marnaba ma sahlana waxana inta badan lagu saleeyaa ku-talagalka jira iyo shuruudo qeexan. Xaaladda Iskaashiga EIDACS, in kasta oo cabbirrada saamaynta ee barnaamijyada qaar lagu guuleystay oo ay jirto maalgelin dheeri ah oo loogu talagalay sii socoshada qaar ka mid ah hawlaha, suuragal ma ahayn in la helo khayraad maaliyadeed,dad ama mid kaleba si loo buuxiyo qaar ka mid ah meelaha ay wax badan ka dhiman yihiin.

Iskaashiga EIDACS ayaa muddo dheer u doodi jirey in si ku filan loogu wareejiyo maamulka iyo lahaanshaha degaanka waxayna la-hawlgalayaasha siisay hagid arrintan ku saabsan. In kasta oo la filayey deeq-bixiyeyaashu in ay bixin doonaan maalgelin dheeraad ah iyo in dawladda Soomaaliya ee hadda jirta in ay diyaar u noqon doonto in lagu wareejiyo, ayaa haddana waxa weli jira wax badan oo muhiim ah oo ka dhiman sii socoshada adeegyada aasaasiga ah, ee lagama maarmaanka u ah nolosha bulshooyinka uu barakacu saameeyey. Marka la eego heerka baahida ka jirta Soomaaliya iyo khayraadka maaliyadeed iyo midka dadka ee loo baahan yahay si wax looga qabto, wax lala yaabo ma aha waxayna sii xaqiijinaysaa in loo baahan yahay in joogteynta/waaridda barnaamijka looga sii fekero wejiga naqshadaynta iyo in ay arrintan macquul tahay xaaladda noocaan ah. Dalladaha Kale ee Xalalka Waara ee uu maalgeliyo Midowga Yurub ee ka jira Soomaaliya ayaa wajahaya caqabado la mid ah.

Xaaladdan, Iskaashiyada ayaa go'aansaday in ay isu yimaadaan oo ay ka wada-shaqeeyaan warqad diiwaangelin karta saamaynta ay leeyihiin Xalalka Waara, nusqaamaha muhiimka ah iyo farriimaha muhiimka ah, iyada oo akhristayaasha la beegsanayo ay yihiin deeq-bixiyeyaasha iyo daneeyeyaasha.  Kulanka Kooxda Farsamada Shaqada ee bishii Febraayo 2020 lagu qabtay magaalada Muqdisho, ee ay wada fududeeyeen EIDACS iyo ReDSS ayaa bixiyay fursad muhiim ah oo lagu wada dooday, la is dhaafsaday fikrado iyo dib-u-milicsi. Doodaha ayaa diiradda lagu saarey shantan arrimood ee soo socda:

1. Qiimaynta waaridda hawlaha ka-dib marka uu barnaamijka dhammaado
2. In laga fekero u wareegidda hawlwadeenada iyo la-hawlgalayaasha kale ee suuragalka ah
3. Maaraynta filashooyinka ka-faa'iideystayaasha, shaqaalaha, la-hawlgalayaasha iyo daneeyeyaasha kale
4. Wareejinta/gudbinta aqoonta iyo casharrada la bartay
5. U doodidda, oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah barnaamijyada la-hawgallaha hirgelinta, maamulada dawladda, hay'adaha QM iyo deeq-bixiyeyaasha.

Natiijooyinkii ka soo baxay kulankan ayaa loo adeegsay in lagu qoro dukumenti ay ku qoran yihiin dhammaan fikradaha la-hawlgalayaasha oo ay tahay in loo wadaago sida hagidda mustaqbalka. Farriimaha muhiimka ah ee dukumentigan ayaa waxa ay ku qoran yihiin sanduuqa hoose.

Iyada oo qayb ka ah dadaallo lagu raadinayo qaabab kale oo lagu buuxinayo halka ay wax badan ka dhiman yihiin ka-dib marka uu soo gebageboobo barnaamijka EIDACS, waxa muhiim noqon doonta in la eego hababka maalgelinta QM ee dawladaha sida Sanduuqa Horumarinta Degaanka (LDF), hab maalgelin lagu kordhinayo dhisidda kartida adeeg bixinta dawladda. Sidaas oo kale, waxa jira Habka Adeeg Bixinta (SDM oo ah qaab iyo hab deeq labadaba la wada maalgeliyo oo u dhexeeya UNICEF iyo Barnaamijka Wadajirka ah ee Dawladaha Hoose (JLPG), dawladda dhexe iyo dwladda hoose.

In kasta oo ay hore u jiraan waayo-aragnimo laga dheehday Somaliland iyo Puntland, wadahadallada ka socda Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed ee Soomaaliya waa kuwo bilow keliya ah balse dhiirrigelin leh waxa jira rabitaan siyaasadeed iyo furfurnaan. Habkan waa hab dheer oo dhaca keliya ka-dib hawsha qorshaynta ee laga wada qaybqaato ee lala yeesho bulshooyinka, ka qaybgelinta tababarka maaraynta mashruuca iyo miisaaniyadaha degaanka ee dawladaha hoose. Caafimaadka iyo waxbarashada ayaa lagu dari karaa qaababka SDM, tusaale ahaan, ka-dib istiraatiijiyadaha daadejinta/baahinta maamulka ee la isku raacay ee u dhexaysa wasaaradaha adeegga

iyo dawladaha hoose. Si kastaba ha ahaatee, hadda la joogo, cudurka safmarka ah ee COVID-19 ayaa qasbay in la hakiyo hannaankan.

Hadda la joogo, in kasta oo shaqoon horumarineed aanay ka hawlgelin Soomaaliya, haddana istiraatiijiyado muddo-dheer soconaya ayaa lagu taliyeay si loo taageero fursadahan, ilaa dawladaha hoose ay ka awoodaan in ay soo saaraan dakhli ku filan oo u suuragelinaya in ay bixiyaan adeegyada aasaasiga ah iyagga oo ka bixinaya khayraad iyaga u gaar ah oo leh karti ku filan. Dawladaha nugul ee ay xaaladoodu adag tahay sida Soomaaliya oo kale, istiraatiijiyadahan muddada dheer ayay weli u baahan doona in ay sii bilaabaan iyaga oo raacaya kuwo muddo-gaaban iyo muddo-dhexeba ah, oo bixinaya taageero bani'aadanimo ilaa ay dawladdu u awooddo in ay si taabogal ah ula wareegto mas'uuliyadda.

Waa in aan aynaan iloowin in barakacayaasha loo sii tixgeliyo in ay yihiin qaybta "kuwa ugu fog ee laga tagay". Waa in aan sii wadno dadaalladeena si aan habab hal-abuur leh ugu helno Xalal Waara ee iyaga loogu talagalay.



Jid cadaha soo gala magaalada Baydhabo oo la dhameeyey. Sawir-qaade: Cabdulaahi Cabdulle, Sarkaalka Mashruuca Maciishadaha, Xalalka Waara ee Danwadaag.

## Barnaamijka Xalalka Waara ee RE-INTEG ee Midowga Yurub – Farriimaha muhiimka ah iyo khariidadaynta halka ay wax badan ka dhiman yihiin

### Qoddobada muhiimka ah ee la tixgelinayo

Iyada oo lagu salaynayo hirgelinta barnaamijka saddexdii sano ee la soo dhaafay, Iskaashiyada RE-INTEG iyo la-hawlgalayaashooda (EIDACS, JSC, SDSC iyo DSIRS) ayaa waxa ay jeclaan lahaayeen in ay soo bandhigaan qodobbadan muhiimka ah ee soo socda si ay u tixgeliyaan deeq-bixiyeyaashu.

Qoddobadaan muhiimka ah waxa ay ku salaysan yihiin waaridda maalgelinnada Xalalka Waara, ee intii uu barnaamijka socdey, laga hirgeliyay degaamada oo dhan (Dawlad-goboleedka Koonfur Galbeed, Jubbaland, Somaliland, iyo Puntland):

- Baahida loo qabo in la sii wado maalgelinta oo mudnaan la siiyo waaxaha waxbarashada, caafimaadka iyo nafaqada. In kasta oo Iskaashiyada RE-INTEG ay horumar ka gaareen, haddana waxa weli taagan baahi weyn oo loo qabo kor-u-qaadista adeegyada aasaasiga ah ee goobaha barnaamijka si loo xaqiijiyo waaridda, iyada oo loo marayo ka qaybgalka deeq-bixiyeyaasha, dawladda iyo waaxda gaarka loo leeyahay. Waa in dareen gaar ah loo muujiyaa tababarka macalimiinta iyo waxyaabaha muhiimka ah si helidda iyo tayada mudnaan loo siiyo.
- Fursadda lagu ballaarinayo laguna xoojinayo awoodsiinta dhaqaale/qaybaha maciishadaha, kordhinta isku-xirrada suuqyada iyo in dhallinyarada iyo haweenka ay ka mid ahaadaan maaliyadaha, oo ay soo raacdo shirkado ganacsi oo ay wada leeyihiin dowladda iyo ganacsato. Hay'adaha maalgelinta yar yar (MFIs) ee aan rasmiga ahayn ayaa waxa ay u horseedeen ka qaybgal ama ka mid ahaansho maaliyadeed kuwa aan haysan habab ay ganacsiyadooda ugu helaan maaliyado maalgelin ama amaah. Midowga Yurub waa in uu tixgeliyaa in uu fahmo waxyaabaha muhiimka ah ee laga bartay Iskaashiyada barnaamijka RE-INTEG ee ku saabsan natiijadan, si loogu saleeyo fekerka istiraatiijiyadda Horumarinta Dhaqaalaha iyo Degaanka ee Loo Dhan Yahay (ILED) iyo hirgelinta barnaamijka ee ku saabsan horumarinta awoodsiin dhaqaale iyo abuurista maciishado la joogteyn karo oo loogu talagalay bulshooyinka uu barakacu saameeyay. Halkan ka eeg daraasad xaaladeed oo ay la socodaan casharro laga bartay EIDACS oo ku saabsan 'Dhisidda iyo taageeridda ganacsiyada yar yar ee bulshooyinka uu barakacu saameeyay'.
- Maalgelinta sii socota ee loogu talagalay ku soo daridda waxqabadyada iyo istiraatiijiyadaha ilaalinta, si loo yareeyo tirada bulshooyinka barakacay iyo kuwa aan soo barakicin ee la kulma dembiyo rabshado wata iyo/ama dhacdo bedqab, oo uu ka mid yahay Tacaddiga Ku Saleysan Jinsiga Ama Galmada (SGBV).

- Maalgelinta awoodda  dawladda si ay isugu dubarido oo ay u hogaamiso hannaanada xalalka. Barashada waafaqsan barnaamijka RE-INTEG ayaa horseeday sii wanaajinta qorshaeynta iyo isuduwidda barnaamijka Xalalka Waara ee hoos-yimaada hogaaminta maamulada ka jira guud ahaan degaamada kala duwan ee mashruuca laga hirgelinayo. Iskaashiyada EIDACS, JSC, SDSC iyo DSIRS ayaa dawladda ka qaybgaliyey hirgelinta hawlo gaar ah oo ka mid ah barnaamijka, iyada oo loo marayo Guddiga Jihaynta/ Hagidda Mashruuca iyo kulamada Kooxda Farsamada Shaqada, hannaanka kormeerka sida wadajirka ah loo sameeyo iyo iyada oo loo marayo tababarro diiradda lagu saarayo xallalka. Waxa Intaa dheer, in ay jireen dadaallo lagu taageerayay awoodda farsamo ee maamulada, iyada oo loo marayo in shaqaale ergo ah loo diro wasaaradaha ay khuseyso ama ku habboon (tusaale, shaqaalaha ergo ah oo EIDACS u dirtay Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorshaynta Dawlad-goboleedka Koonfur Gableed ee Soomaaliya). Maalgelintan ayaa aasaas u noqon doonta hogaaminta dawladda ee sii socota ee barnaamijyada xalalka sidaas darted, waa in la taageeraa si loo xaqiijiyo hab ay dawladdu hogaamiso oo loo marayo Xalalka Waara.
- In maalgelinnada hore loo sameeyay loo adeegsado si waafaqsan barnaamijka RE-INTEG oo leh maaliyadsiin suuragal ah oo cusub iyo barnaamijyada Xalalka Waara oo sii socda. Midowga Yurub waa in uu ka fekeraa maaliyadsiin bedel u ah si loo buuxiyo baahiyada halka ay wax badan ka dhiman yihiin, gaar ahaan kuwa la xiriira adeeg bixinta, iyo iyada oo maalgelinnada loo sameeyay si waafaqsan barnaamijka RE-INTEG lagu xiriirinayo maaliyadsiinta la qorshaynayo (tusaale ahaan, barnaamijla ILED, barnaamijka Samaynta, Waxqabadka Adkaysiga ee Wadajir Ahaanta Loo Sameeyo/Joint Resilience Action-JRA) ama maaliyadsiinta dheeraadka ah ee deeq-bixiyeyaasha kale (Swiss, Bangiga Adduunka iwm).
- Maalgelinta cabbiridda horumarka laga sameeyay ee dib-u-dhexgelinta bulshada oo la joogteyn karo. La-hawlgalayaasha barnaamijka RE-INTEG ee Midowga Yurub, oo taageero ka helaya ReDSS, ayaa waxa ay sameeyeen dadaallo lagu diyaarinayo hab lagu cabbiro horumarka laga gaarey dib-u-dhexgelinta bulshada. Arrintan afarta ayaa lagu saleeyey afarta natiijooyinka guud ee mashruuca: (i) ka-qaybgalka dawladda/ka-qaybgalka bulshada, (ii) helidda adeegyada aasaasiga ah, (iii) maciishadaha, iyo (iv) cilmi-baaris iyo barasho. Iyada oo lagu salaynayo casharaddii laga bartay barnaamijka, barnaamijyada Xalalka Waara ee Midowga Yurub ee mustaqbalka waa in ay xaqiijiyaan in ay sameeyaan isbeddel aragti cad leh, kaas oo muujinaya dhabbaha sababta u noqon kara horumarinta dib-u-dhexgelinta bulshada waxna ka qaban kara nuglaanta guud ahaan bulshooyinka uu barakaca saameeyey ee la beegsanayo, laga soo bilaabo marxaladda bilowga iyo naqshadaynta ee barnaamijka. Midowga Yurub ayaa sidaas oo kale wax ka baran kara waayo-aragnimada la-hawlgalayaasha Iskaashiga Danwadaag, kuwaas oo sameeyey Tusmada Dib-u-dhexgelinta Bulshada Degaanka (LoRI) si loo cabbiro ilaa heerka ay ka-faa'iideystayaasha la beegsanayo ee barnaamijka u dhexgeleen bulshada degaanka iyo in si wanaagsan loo fahmo cunsurrada iyo adeegyada kala duwan ee raadadka ku reebay dib-u-dhexgelinta bulshada degaanka ee bulshooyinka uu barakacu saameeyey.

**Bishii Abriil ee 2020,**

Dib-u-dhexgelinta bulshada ee Bulshooyinka uu Barakacu Saameeyay ee Soomaaliya (EIDACS)

Iskaashiga Xalalka ee Jubbaland (JSC)

Iskaashiga Xalalka Waara ee Somaliland (SDSC)

Xalalka Waara ee Shakhsiyaadka Gudaha Ku Barakacay (IDPs) iyo Kuwa Soo Guryo-noqdey ee Soomaaliya (DSIRS)

# Qorayaasha Ka-qaybqaatay

**Beatriz Valbuena**, Isuduwaha Iskaashiga Xalalka Waara ee EIDACS, Concern Worldwide Somalia

**Peter de Clercq**, La-taliye Caalami ah, Ku-xigeenkii hore ee Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Hawlgallada Soomaaliya (UNSOM), halkaasi oo uu sidaas oo kale ka soo noqday Wakiilka iyo Isuduwaha Dhinaca Hawlaha Bani'aadamnimada ee Qaramada Midoobay iyo Wakiila Hay'adda Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP).

**Teresa del Ministro**, Isuduwaha Xalalka Waara, Qaybta Xalalka Waara, Xafiiska Isku-dhafka ah ee Isuduwaha Qaramada Midoobay u Qaabilsan Dhinaca Hawlaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya.

**Rufus Karanja**, Maareeyaha Xalalka Waara – Soomaaliya. Xoghaynta Xalalka Waara ee Gobolka (ReDSS)

**Lena Von Naso**, Sarkaalka Ka-warbixinta iyo MEA ee Iskaashiga Xalalka Waara ee Danwadaag (ku-meelgaar ah) Qaybta Xalalka Waara iyo Soo-Kabashada - Xafiiska Taageerada ee Nayroobi, Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka faraceeda Soomaaliya (IOM Somalia)

**Stefanie Barratt**, Hoggaanka Tiirka Jaangooyooyinka & Falanqeynta Xogta (Data Standards & Analytics Pillar lead), Samuel Hall

**Courtenay Cabot Venton**, The Share Trust

**Joseph Jackson**, Khabiirka Karti-Xirfadeedka Aasaasiga u ah ICLA (ICLA Core Competency Specialist), Hay'adda Norwegian Refugee Council faraceeda Soomaaliya

**Finola Mohan**, La-taliyaha Barnaamijka Aqoonta iyo Barashada, hay'adda Concern Worldwide faraceeda dalka Ireland

# Ururrada Ka-qaybqaatay

Hay'adahan, ururradan iyo la-hawlgalayaashan soo socda ayaa ka qaybqaatay barnaamijyada Xalalka Waara ee ka jira Soomaaliya waxana lagu xusay caddadkan Maqaalka Arrimaha Aqoonta (Knowledge Matters):

Ogow: Dokumentigan ayaa waxa uu ka hadlayaa hawlaha gargaarka ee la fuliyey iyada oo kaalmo maaliyadeed laga helayo Midowga Yurub, European Union Trust Fund (EUTF). Aaraada halkaan lagu soo bandhigey waa in aan, si kastaba, loo qaadan in ay ka turjumayaan ra'yigga rasmiga ah ee Midowga Yurub, Guddiga Yurubna mas'uul kama aha isticmaal kasta oo loo adeegsado macluumaadka ku jira.

Haddii aad hayso wax biiro, fikrado ama mowduucyo qodobbo mustaqbalka ah oo Maqaalka Arrimaha Aqoonta fadlan la kala xiriira kooxda qorayaasha email knowledgematters@concern.net.

Fikradaha halkan lagu soo bandhigey waa fikrado u gaar ah qorayaasha oo lagama maarmaan ma aha in ay waafaqsan yihiin kuwa hay'adda Concern Worldwide ama la-hawlgalayaasheeda.

## Macluumaadka aasaasiga ah ee Maqaalka Arrimaha Aqoonta

Maqaalka Arrimaha Aqoontu waxa uu bixiyaa lafaguris ku habboon hawlaha bani'aadamnimada iyo horumarinta ee hay'adda Concern Worldwide. Waxa ay shaqaalaha iyo la-hawlgalayaasheedaba siisaa madal ay isku dhaafsadaan fikrado iyo waayo-aragnimo. Maqaaalka waxa ka go'an in uu dhiirrigeliyo lafaguris tayo sare leh oo lagu fahmayo shaqada Concern. Shaqaalaha iyo la-hawlagalaasha Concern ayaa fikradahooda iyo waayo-aragnimadooda dhaxalgalka ah ku soo gudbiya maqaallo. Maqaalladu waa kuwo aad iyo aad u gaagaaban oo u dhaxeeya – 500 – 1,500 oo eray. Caadi ahaan waxa aad haysataa oo keliya meel aad ku soo bandhigi karto labo ama saddex qoddob oo xiiso leh.Waa kuwan qaar ka mid ah tallooyinka ku saabsan qorista maqaal gaaban oo mowduuc gaar ah ka hadlaya:

- Ku bilow in aad iska soo qaado qofka akhrinaya maqaalkaaga – oo ah saaxiibada aad ka wada shaqaysaan Concern. Maxaa ay aad u xiiseynayaan – maxaa ay tahay sababta ay u doonayaan in ay akhriyaan waxa aad sheegi doonto? Marka aad aqoonsato waxa uu yahay qoddobkaaga ugu muhiimsan, isla markiiba si toos ah ugu sheeg, cinwaanka ama weerta koowaad.
- Maxaa ay dadka kale ka baran karaan sheekadaada? Diiradda saar arrintan. Xusuusnow in aad sheekadaada ku kaabto caddayn. Caddaymaha waxa laga soo qaadan karaa qiimayn la sameeyey.
- Waxa fudud in ay dadku akhriyaan qoraalka aad ku bilawdo wax la xiriiro dad caadi ah - adiga oo sheegaya dad dhab ah iyo dhacdooyinka nolosha dhabta ah la xiriira. (Qasab ma aha in aad magacyo xusto).
- Isticmaal weero gaagaaban. Isticmaal hagaha qaabka wax loo qoro ee Concern si uu kuu caawiyo.
- Farqadaha dhererkooda ka dhig ugu badnaan lix sadar.
- Adeegso luqad si sahlan loo fahmi karo. Akhristayaasha maqaalka Arrimaha Aqoonta badankoodu waa kuwo Af-Ingiriisigu aanu ahayn afkooda hooyo, sidaas awgeed si taxader leh uga feker adeegsiga weeraha maldahan ama af-suuqeedka laga yaabo in aanay dadka kale si fudud u fahmi karin.
- Had iyo jeer iska ilaali in aad ismoodsiiso in akhristahu uu aqoon heer sare ah u leeyahay mowduuca aad wax ka qorayso.
- Adeegso weero firfircoon ('waxa aanu qabanay aqoon-isweydaarsi' halkii aad ka odhan lahayd 'aqoon-isweydaarsi ayaa waxa qabaty annaga ')
- Adeegso hadallo gaagaaban oo qeexan.
- Cinwaankaaga ka dhig mid gaaban – oo ugu badnaanka kooban siddeed eray.
- Halkii loo baahdo adeegso sawirro sheekada la socda balse hubi in aad raacdo Xeer-hab-dhaqanka Dóchas ee Muuqaallada iyo Farriimaha.

---

**Sawirka jeldiga:** Qoraalka sawirka jeldiga: Waa xiisad xisaab ah oo ay qaadanayaan 20 haween ah oo ka tirsan Kooxda Is-caawisa ee Degmada Afgooye 2019. Sawir-qaadaha: Maxamed Axmed Abuukar (Naaji), SHACDO.

## Cidda majaladda loogu talagalay

Dhammaan shaqaalaha ku lugta leh naqshadaynta, hirgelinta, maaraynta, kormeerka, qiimaynta iyo ka-warbixinta shaqada hay'adda Concern. Maqaalladan waa in sidaas oo kale lala wadaagaa la-hawlgalayaasha.

## Maqaalladan waxa ku jira

- Hab-dhaqan rajo wanaagsan laga dheehan karo
- Barasho hay'adeed
- Dhiirgelinta qaababka isku-dhafka ah iyo waaxaha badan ee barnaamijyada
- Xiriirrada/Links warbixinnada oo dhammeystiran

## Maqaallada waxan ku jirin

- Talooyin la beegsanayo
- Caddayn dheeraad ah oo aan ku jirin warqadaha la soo xigtey
- Sharraxaadaha faahfaahsan ee waxqabadyada ama hirgelintooda

## KOOXDA SHAQADA TIFATIRKA

- **Finola Mohan:** Tifaftiraha Guud
- **Beatriz Valbuena:** Tifaftiraha Caddadka

**Ereyada muhiimka ah**
Xalal Waara, Ka-qaybgalka Bulshada, Hoggaaminta Dowladda, Soomaaliya, Barakac

Fikradaha lagu soo bandhigey maqaalladan Arrimaha Aqoonta (Knowledge Matters) waa fikrado u gaar ah qorayaasha oo lagama maarmaan ma aha in ay waafaqsan yihiin kuwa hay'adda Concern Worldwide ama la-hawlgalayaasheeda. Hay'adda Concern Worldwide ayaa waxa ay dhiirrigelisaa daabicidda ama nuqullo ka samaynta macluumaadka oo loogu talagalay isticmaalka shakhsiyeed iyo midka aan ganacsiga ahayn haddii meesha laga soo xigtay si cad loo aqoonsanayo.

Naqshadaynta iyo Daabicidda: Pixelpress

**Republic of Ireland**
52-55 Lower Camden Street
Dublin 2
00 353 1 417 77 00
info@concern.net

**Northern Ireland**
47 Frederick Street
Belfast
BT1 2LW
00 44 28 9033 1100
belfastinfo@concern.net

**England and Wales**
13/14 Calico House
Clove Hitch Quay
London
SW11 3TN
00 44 207 801 1850
londoninfo@concern.net

**Republic of Korea**
(04034) 5 fl, 12, Yanghwa-ro
11-gil, Mapo-gu, Seoul,
Republic of Korea
00 82 324 3900
www.concern.kr

**USA**
355 Lexington Avenue
16th Floor
New York
NY 10017
00 1 212 5578 000
info.usa@concern.net

**www.concern.net**

# MAQAALLADA ARRIMAHA AQOONTA

**Caddadkii 27ka | Maajo, 2020**

CONCERN worldwide

ENDING EXTREME POVERTY WHATEVER IT TAKES